# JAMHUURIYADA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILADA

# XEERKA XABSIYADA

## *(XEER Lr. 65/2014)*

*December 2014*

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/WM/222-04/122017** **Taar: 26/12/2017**

## Wareegto Madaxweyne

## Dhaqan-galka Xeerka Xabsiyada Somaliland
## Xeer Lr. 65/2014

**Markaan Arkay:** Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

**Markaan Arkay:** Go'aanka Golaha Wakiillada, Go'aan Lr. GW/KF-35/747/2017, summadiisuna tahay Ref: GW/G/26/168/2017, kuna taariikheysan 19/12/2017, ujeeddadiisuna tahay soo gudbin go'aanka ansixinta Xeerka Xabsiyada Somaliland, Xeer Lr. 65/2014;

**Markaan Arkay:** Qodobada 75aad, 76aad, 77aad (5), 78 (3) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Waxaan soo-saaray;**

**Wareegtadan oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Xeerka Xabsiyada Jamhuuriyadda Somaliland, Xeer Lr. 65/2014.**

**Allaa Mahad Leh**

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

**Muuse Biixi Cabdi**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

The Republic of Somaliland | Jamhuuriyadda Somaliland
House of Representatives | Golaha wakiilada
Head Quarter Hargeisa. | Xarunta Hargeisa
Ref: GW/KF-35/747/2017 Date: 12/12/2017

**Ujeedo:- Go'aanka Ansixinta Xeerka Xabsiyada Somaliland Xeer Lr. 65/2014**

## GOLAHA WAKIILADDU

**Markuu Arkay:-** **Qodobada 78aad Farqadiisa 3aad** iyo **4aad,** ee Dastuurka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu Tixgaliyay:-** Baahid loo qabo in Xabsiyadu yeeshaan Xeer lagu maamulo oo tilmaamay sida loo maamulayo Maxaabiista iyo Xabsiyada.

**Markuu Ogaadey:-** In uu xabsigu yahay goob lagu edbiyo laguna toosiyo maxbuuska dawladana xilbaa ka saaran kor u qaadida akhlaaqda iyo xirfad barida maxbuuska si uu ugu noqdo bulshada isaga oo yeeshay dhaqan suuban.

**Markuu ka Dooday:-** Dib usoo celinta Madaxwaynaha JSL ee xeerkan Xabsiyada.

**Markuu u codeeyay:-** Ansixinta Xeerka Xabsiyada Somaliland **kal-Fadhigii 35aad** ee **fadhigiisi 5aad 03/12/2017** oo goob jog ahaayeen **(60)** Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL

## WUXUU

Cod aqlabiyad oo Saddex Meelood Laba (2/3) ah (57) todoba iyo konton cod oo gacan tag ah ku ansixiyey **Xeerka Xabsiyada Somaliland Xeer Lr. 65/2014** halka cid diiday aanay jirin, laba (2) mudanena ka aamuseen, Guddoomiyuhuna muu codayn sida caadada ah.

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JS

Baashe Maxamed Faarax
Guddoomiyaha Golaha Wakiilada JSL.

GOLAHA WAKIILADA
JAMHUURIYADA SOMALILAND

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILADDU

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:-** | **Qodobada 27aad Farqadiisa 8aad, 37aad iyo 38aad** ee Dastuurka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland. |
| **Markuu Tixgaliyay:-** | Baahid loo qabo in Xabsiyadu yeeshaan Xeer lagu maamulo oo tilmaamay sida loo maamulayo Maxaabiista iyo Xabsiyada. |
| **Markuu Ogaadey**:- | In uu xabsigu yahay goob lagu edbiyo laguna toosiyo maxbuuska dawladana xilbaa ka saaran kor u qaadida akhlaaqda iyo xirfad barida maxbuuska si uu ugu noqdo bulshada isaga oo yeeshay dhaqan suuban. |

## Wuxuu Ansixiyay
## Xeerka Xabsiyada Somaliland
## Xeer Lr. 65/2014

## QAYBTA 1AAD
## QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad
### Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa loogu yeedhayaa "**Xeerka Xabsiyada Somaliland ee Xeer Lr. 65/ 2014**", waxaana loo soo gaabsan karaa "Xeerka Xabsiyada."

### Qodobka 2aad
### Ereybixin

Haddaan Xeerkan si kale loogu sheegin, ereyadan hoos ku qoran waxa loola jeedaa:

| | |
|---|---|
| **Wasiir**:- | Wasiirka Cadaaladda JSL |
| **Taliyaha Ciidanka:-** | Taliyaha Ciidanka Asluubta. |
| **Ciidanka:-** | Ciidanka Asluubta Jamhuuriyadda Somaliland |
| **Maxbuus:-** | Qof xabsiga loogu hayo xukunsane ama garsuge ahaan |
| **Maxbuuska Carruurta ah**:- | Maxbuuska aan gaadhin da'da qaan-gaadhka, sida ku xusan Xeerka Garsoorka Caruurta (Xeer No.35/2007). |
| **Amar joogta ah:-** | waa amarka uu soo saaro taliyaha Ciidanku oo lagu dhaqayo xabsiyada |
| **Amar Taliye:** | Waa amaro lagu Hagaajinayo nidaamka Xabsiyada. |
| **Maxbuus da'-yare ah**:- | Maxbuuska da'diisu u dhaxayso da'da uu ku qaan-gaadhay ilaa 25 sano. |
| **Maxbuus xadhig-yare ah:-** | Maxbuuska ku xukuman xadhig ka yar laba sano |
| **Maxbuus xadhig-dheere ah:-** | Maxbuuska ku xukuman xadhig laba sano ama ka badan |
| **Maxbuus garsuge ah: -** | maxbuuska uu xabsi-ku-hayntiisa amray garsoore awood u lihi fal-dembiyeed lagu eedeeyey dartii, welina aan lagu caddayn fal-dembiyeedkaas; |
| **Maxbuus xukumane ah:-** | Maxbuuska, ay makamadda dhegeysiga dacwaddiisa awoodda u leh, uu kaga hor-caddaaday dembigii uu ku eedaysnaa oo garsoore maxkamadda ka tirsani ku xukumay ciqaabta xeerku u Jideeyey. |
| **Maxbuus ammaan sare: -** | Maxbuuska loo soo xidhay dembi aad u culus, oo ammaanka Qaranka lid ku ah, oo halis ku ah ammaanka xabsiga, sidaa darteedna u baahan ilaalin heerka ugu sarraysa ah. |
| **Maxbuus ammaan dhexe: -** | Maxbuuska loo soo xidhay dembi culus, oo ammaanka xabsiga wax yeellayn kara, sidaa darteedna u baahan ilaalin sare. |
| **Sarkaal caafimaad**:- | qof ka mid ah hawlwadeennada xabsiga u qaabilsan xagga caafimaadka. |

| | |
|---|---|
| **Sarkaal Xabsi:-** | Xubin Ciidan oo mas'uuliyad ka haysa xabsiga. |
| **Xubin Ciidan:-** | Xubin ka mid ah Ciidanka Asluubta oo aan xil ka hayn xabsi. |
| **Taliye Xabsi:-** | Sarkaalka masuulka ka ah xabsi. |
| **Alaabta reebban:** - | Shay kasta oo la mamnuucay in xabsiga lala galo ama lagala baxo ee la dhejiyay liiskooda si xeerkan waafaqsan. |
| **Xabsi:** - | Dhisme ama goob si xeerka waafaqsan loogu gaar-yeelay in lagu hayo dadka xeerarku u aqoonsadeen xukunsane ama garsuge. |
| **Habraaca Maamul:-** | waa Nidaam Maamul ee Taliye Xabsi u dejiyo Xabsiga isaga oon ka hor imanayn waajibaadyada ku xusan Xeerka Xabsiyada( Xeer Lr.65/2014) Xeer-nidaamiyihiisa |
| **Xeer-nidaamiye:-** | Waa xeer-nidaamiyaha Xeerkan xabsiyada waxaana soo saaraya Wasiirka Cadaalada. |

## Qodobka 3aad
## Ujeeddooyinka Xeerka

1. Ujeeddooyinka Xeerkan laga leeyahay waa:

   b) In lagu maamulo xabsiyada dalka, laguna sugo ammaankooda;

   t) In lagu xaqiijiyo ku-haynta maxaabiista xabsiyada dalka muddada xadhiggooda la jideeyey;

   j) In lagu ilaaliyo xuquuqda maxaabiista ku xidhan xabsiyada dalka, laguna dhawro daryeelkooda;

   x) In lagu toosiyo hab-dhaqanka maxaabiista, laguna xaqiijiyo in dhammaadka xadhiggooda ay ku noqdaan bulshada iyagoo sii wadan kara nolol mas'uuliyadi ku dheehan tahay;

   kh) In lagu meel-mariyo la-socoshada iyo xog-uruurinta la xidhiidha tirada sannad walba xabsiyada xadhig u gasha iyo macluumaadka dadka hore xabsi u soo galay ee dib loo soo xidho.

2. Hadafka xabsiyadu waa dhaqan-celinta, edbinta iyo toosinta, iyo waxbaridda maxaabiista, si ay bulshada dib ugula noqdaan hab-dhaqan wanaagsan.

## Qodobka 4 aad
## Dabbaqaadda Xeerka

Xeerkan waxaa lagu dabbaqayaa xabsiyada dalka Jamhuuriyaadda Somaliland.

**Qodobka 5aad**
**Mas'uuliyadda Haynta iyo Dhaqan-Celinta Maxaabiista**

Xabsiyada, haynta maxaabiista iyo dhaqan-celintoodu waa mas'uuliyad u gaar ah xukuumadda, waxaana uga masuul ah Ciidanka Asluubta, cid kalena uma wareegi karto mas'uuliyaddaasi.

**Qodobka 6aad**
**Reebbanaanta Goobo lagu Hayo Dad Xorriyadda laga Qaaday oo aan Ahayn Xabsi**

Waxa reebban in dalka Jamhuuriyadda Somaliland ay ka jirto goob lagu hayo dad xorriyaddooda looga qaaday abaal-marin iyo dhaqan-celin darteed oo aan ahayn xabsiyada, marka laga reebo:

b) xarumaha dhaqan-celinta ee waafaqsan Xeerka Cadaaladda Carruurta sharciga khilaafta (Xeer Lr.36/07); iyo
t) saldhigyada Booliiska iyo xarumaha Waaxda Baadhista Dembiyada ee Ciidanka Booliiska ee si sharciga waafaqsan baadhis awgeed dad loogu hayn karo muddo xeerarku xaddideen.

**Qodobka 7aad:**
**Doorka Wasaaradda Cadaaladda ee Xabsiyada**

Wasaaradda Cadaaladdu waxay masuul uga tahay xukuumadda arrimaha la xidhiidha xabsiyada iyo maxaabiista, iyadoo ay ku leedahay awoodahan soo socda:

1) dejinta iyo hirgelinta Siyaasadaha Qaran ee xabsiyada;

2) aasaasidda, furidda, xidhidda iyo hagaajinta xabsiyada; marka lagala tashado Taliyaha-Ciidanka Asluubta.

3) Soo-saaridda xeer-nidaamiyaha Xeerkan, iyada oo lala tashanayo Taliyaha Ciidanka Asluubta.

4) kormeeridda, dabagalka, qiimaynta xaaladaha xabsiyada iyo toosinta, tilmaamidda iyo ka-gacan-siinta Ciidanka Asluubta arrimaha la xidhiidha xaaladaha xabsiyada iyo maxaabiista iyo kala-xisaabtanka arrimaha la xidhiidha xabsiyada Ciidanka Asluubta iyo cid kasta oo la shaqaysa;

5) diyaarinta, hirgelinta, qiimaynta iyo soo-jeedinta qorsheyaasha iyo istaraateejiyadaha lagu horumarinayo, lagu tayaynayo ama lagu hirgelinayo xabsiyo la heer ah kuwa caalamka, iyadoo lala tashanayo Taliyha Ciidanka Asluubta;

6) u-hawl-galka iyo u-ololaynta dhaqaalaha lagu fulinaayo haynta, daryeelka iyo dhaqan-celinta maxaabiista;

7) Tayaynta iyo kor-u-qaadista kartida iyo aqoonta taliyeyaasha, saraakiisha xabsiyada isaga oo la tashanaya Taliyaha Ciidanka Asluubta.

8) ilaalinta Xuquuqda Aadamaha ee sharcigu u damaanad qaaday maxaabiista;

9) soo-saarista, faafinta, dabagalka fulinta xeer-nidaamiyeyaasha iyo wareegtooyinka lagu nidaaminayo, laguna fulinayo siyaasadaha iyo xeer-nidaamiyaha Xeerka xabsiyada;

10) ka war-bixinta baahiyaha, wax-qabadka, dhalliilaha iyo carqaladaha la xidhiidha xabsiyada; ka dib marka uu ka helo la xidhiidha arrimahaas Taliyaha Ciidanka.

11) Wasaaradda Cadaaladu waxay u xil-saaran tahay inaan qofna lagu xidhi Karin meel aan ahayn Xabsiyadda Dawladda ee Xeerka Xabsiyadu jideeyey.

## Qodobka 8 aad
## Xuquuqda Maxbuuska

Maxbuusku waa qof nugul oo xorriyaddii laga qaaday, waxaanu xaq u leeyahay inta uu xidhan yahay xuquuqahan soo socda:

(1) in loola dhaqmo si siman oo aan lahayn takoor iyo faquuqid ku salaysan jinsi, diin, af, goob dhalasho, aragti siyaasadeed ama reernimo;

(2) in loola dhaqmo si ixtiraam, xaq-dhawrid iyo aadaminimo leh;

(3) in loo hayo oo keliya si sharciga waafaqsan, loona sii daayo sida ugu dhakhsaha badan marka uu sii-deyn xaq u yeesho;

(4) in aan lagula kicin jidh-dil ama quudhsi;

(5) in loo oggolaado xidhiidhka qoyskiisa, ehelkiisa, qaraabadiisa, saaxiibbadiisa iyo ciddii kale ee uu doorto la-kulankooda ama iyagu doorta la-kulankiisa;

(6) in lagu war-geliyo xaqa qareen-yeelashada iyo racfaan-qaadashada;

(7) in fursad loo siiyo helitaan qareen xuquuqdiisa u difaaca, wax xaddidaad ahna aan laga saarin xaqa qareen-yeelasho iyo la-kulanka qareenkiisa;

(8) in fursad loo siiyo, loona fududeeyo ka-racfaan-qaadashada xukunnada ku dhaca;

(9) in uu helo cunto iyo biyo nadiif ah oo ku habboon marba xaaladda caafimaad ee maxbuuska;

(10) in uu helo goob hurdo iyo gogol ku habboon noloshiisa iyo xaaladdiisa caafimaad;

(11) in uu helo daryeel caafimaad, baadhis iyo daweyn caafimaad mar kasta oo uu u baahdo, iyo in laga baadho caafimaadka maxbuuska meel lagula xidhayo;

(12) in uu ku noolaado heer nadaafadeed oo ku habboon in lagu noolaado;

(13) in uu helo qorrax-u-bixid iyo Jimicsi;

(14) in uu xor u noqdo diintiisa, fursadna loo siiyo cibaadaysiga iyo ku dhaqanka diintiisa;

(15) in uu ka faa'iidaysto xabsi-dhimista ama sii-deynta shuruudaysan si caddaalad iyo sinnaan ah oo xeerka waafaqsan;

(16) in fursad loo siiyo cabashada, lana dhegaysto, loogana jawaabo cabashadiisa, baadhisna lagu sameeyo marka la garawsan karo, loona gudbiyo natiijada baadhista si xeerka waafaqsan;

(17) in uu helo turjumaan marka aanu fahmayn afka lagu wada hadlayo;

(18) in loo ilaaliyo loona xafido hantida uu xabsiga la soo galo ama loogu keeno si sharciga waafaqsan;

(19) in, mar kasta oo laga beddelo xabsiga uu ku xidhan yahay, lagu war-geliyo xabsiga loo wareejiyo qoyskiisa, qareenkiisa, qaraabadiisa iyo ciddii uu doorto;

(20) waxa kale oo uu xaq u leeyahay xuquuqaha kale ee xeerkan ama xeerarka kale ee dhaqan-galka ah loogu dammaanad-qaaday.

## QAYBTA 2AAD
## HIRGELINTA XABSIYADA

### Qodobka 9aad
### Aqoonsiga Xabsiyadii Hore u Jiray iyo Maxaabiista ku Xidhan

Xabsi kasta oo dalkan Jamhuuriyadda Somaliland sifo sharci ah uga dhaqan-galay iyo maxaabiista lagu hayo ka-hor intaanu Xeerkani dhaqan-gelin, shaqeeyana maalinta Xeerkani dhaqan-galo, waxa loo aqoonsanayaa xabsi Jamhuuriyadda Somaliland leedahay, dadka ku xidhanna waxaa loo aqoonsanayaa maxaabiis Qaranka u xidhan.

### Qodobka 10aad
### Dhismaha iyo Sharciyaynta Xabsi Cusub iyo Xidhidda Xabsi Hore

1) Marka loo baahdo dhisme xabsi cusub, goobta laga dhisayo, shuruudaha looga baahan yahay dhismaha xabsiga cusub ama xabsiga gebi ahaanba dib loo dhisayo, qalabka ama heerka badbaado ee looga baahan yahay, naqshadda uu yeelanayo, xuduudaha dhuleed ee uu yeelanayo, aagga loo baahan yahay in aanay degsiimadu u soo dhaafin sababo ammaan dartood iyo arrimaha kale ee looga baahan yahay, waxaa soo jeedinaya Taliyaha Ciidanka waxa oggolaanaya Wasiirka.

2) Marka la dhammaystiro dhismaha loogu talo-galay xabsiga cusub, Taliyaha Ciidanku wuxu u gudbinayaa Warbixinta Xabsigaas wuxu u gudbinaya Wasiirka Caddaaladda JSL; ka dib-marka uu hubiyo in xaalada dhismahaasi ku haboon tahay in xabsi loo adeegsado, wasiirkuna wuxu ansixinaya jiritaanka Xabsigaasi.

3) Wasiirku, ka dib markuu helo soo-jeedinta Taliyaha Ciidanka, wuxuu Xeer-nidaame ku soo-saaraya:-

   b) in dhisme, goob xidhan, ama qaybo kuwaas ka mid ahi, ay noqdaan xabsi;
   t) in xuduudaha xabsi hore u jirey uu is-beddel ku sameeyey.

4) Wasiirku, ka dib markuu helo soo-jeedinta Taliyaha Ciidanka, wuxuu Xeer-nidaamiye ku soo saaraya:-

   b) in xabsi hore u jiray si ku meel-gaadh ah loo xidho, oo dib-u-dhis buuxa lagu sameeyo;
   t) in xabsi hore u jiray si joogto ah loo xidho oo aanu sii ahaan xabsi laga bilaabo taariikhda ay isla gartaan Taliyaha & Wasiirku.

5) Ka-hor taariikhda ay ku egtahay jiritaanka xabsigu ee ku xusan Xeer-nidaamiyaha, si waafaqsan faqradda 4(t) ee qodobkan, Taliyaha Ciidanku wuxuu u rarayaa (maxaabiista ku xidhan xabsiga jiritaankiisa la soo af-jarayo ama sida ku meel-gaadhka ah loo joojiyay isticmaalkiisa iyo wixii hanti ah ee lagama maarmaan u ah maxaabiista la rarayoba) xabsiga ama xabsiyada kale ee dalka ee sii-haynta maxaabiistaas ku habboon.

## Qodobka 11aad
## Xabsi Ku-Meel-Gaadh ah

1) Xabsiga ku-meel-gaaadhka ahi, waa dhismaha ama goobta kale ee xidhan ee uu asteeyo Taliyaha Xabsigu, ka-dib markuu helo oggolaanshaha Taliyaha Ciidanka, si loogu xidho maxaabiis laga rarayo xabsiga, marka xaaladdu in sidaa la yeelo ay lagama maarmaan ka dhigto.

2) Xabsiga Ku-Meel-Gaadhka ah waxa la adeegsan karaa marka:
    - b) tirada maxaabiista ee xabsiga ku xidhani ay ka badato tirada si caqli-gal ah loogu hayn karo xabsiga, isla markaana aan la hayn xabsi kale oo loo raro tirada maxaabiista ah ee dheeraadka ku ah xabsiga; ama
    - t) ay xabsiga ka dilaacaan cudurrada faafaa, ama ay timaaddo baahi kale oo keentay in qaybo ka mid ah maxaabiista si ku-meel-gaadh ah loogu hayo dhisme kale, waxaana ka go'aan-gaadhaya Taliyaha Ciidanka, ka dib markuu helo Warbixinta Hogaanka xabsiyada..

3) Taliyaha Ciidanka ayaa oggolaanaya astaynta iyo isticmaalka xabsiga-ku-meel-gaadhka ah xaalad kasta oo baahidiisa keenta.

4) Mar kasta oo ay xabsi ku timaaddo aafo khatar gelin karta nolosha maxaabiista iyo ciidanka, waxa Taliyaha Xabsiga u bannaan in uu qaado tallaabo kasta oo uu ku badbaadinayo maxaabiista iyo ciidanka, iyadoo sida ugu macquulsan uu isaga xilsaarayo sugidda gacan-ku-haynta maxaabiista.

## Qodobka 12aad
## Ujeeddada Xabsiyada Gaarka ah

Taliyaha Ciidanku isagoo raacaya Sharciga iyo soo jeedinta Wasiirka ee Waafaqsan Xeerkan Xabsiyada, isla markaana meel-marinaya nidaamka kala-soocidda maxaabiista, sida ku xusan qodobka 74aad, wuxuu xabsiyo gaar ah ugu talo-geli karaa noocyo gaar ah oo maxaabiis ah, waxaanu xaddidi karaa tirada nooc maxaabiis ah ee la geyn karo xabsiyo gaar ah, nooc kasta oo maxbuus oo xabsi sidaa loogu gaar-yeelayna sifo sharci ah ayaa lagu geeyey looguna xidhay xabsigaas.

## QAYBTA 3AAD
## MAAMULKA XABSIYADA

### Qodobka 13aad
### Maamulka iyo Gacan-Ku-Haynta Xabsiyada

1) Taliyaha Ciidanku wuxuu mas'uul ka yahay in ay xabsiyadu si fiican u shaqeeyaan, iyada oo mas'uuliyaddiisa ay ka mid tahay xabsi-ku-haynta, daryeelidda, wax-baridda maxaabiista iyo sugidda ammaanka xabsiyada iyo maxaabiista, waxaanu sida ugu dhakhsaha badan ula socodsiinayaa Wasiirka iyo Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka.

   b) Geeri kasta, shil kasta oo halis ah, shaqaaqo, wax-is-weydaarin ama dhacdo aan caadi ahayn oo saamayn ku leh nidaamka kala-dambaynta iyo ammaanka xabsiga ama nolosha iyo hab-dhaqanka suubban ee maxaabiista;
   t) baxsasho kasta ama isku-day kasta oo baxsasho oo maxbuus;
   j) Gaar-u-xidhidda maxbuus, iyada oo la raacayo Xeer-nidaamiyaha Xeerkan.

2) Taliyaha Ciidanku waxa kale oo uu hubinayaa in sida ugu dhakhsaha badan loogu wargeliyo Xeer-Ilaaliyaha Guud:
   b) Geeri kasta oo maxbuus;
   t) Fal-dembiyeedka kasta oo culus oo lagu galay xabsiga.

3) Taliyaha Ciidanka waxaa u banana inuu la tashado Wasiirka si uu adeegsado kaalmada qofksta ama ururkasta oo samo-fal.

4) Taliyaha Ciidanku wuxuu sanadkiiba ugu yaraan 3 jeer booqanayaa oo kormeerayaa ama amrayaa booqashada iyo kormeerista dhammaan xabsiyada dalka, waxaanu natiijada booqashooyinka ama kormeerrada u gudbinayaa Wasiirka.

5) Sidoo gale Taliyaha Ciidanku wuxu awood u leeyahay inuu kormeer & baadhis ugu diri-karo Madaxda & Hogaamadiisa kal duwan ee Ciidamadda.

### Qodobka 14aad
### Amarrada Joogtada ah ee Taliyaha Ciidanka

(1) Taliyaha Ciidanku, mar kasta oo uu lagama maarmaan u arko, wuxuu ka bixinayaa amarro joogto ah maamulka, gacan-ku-haynta, ammaanka iyo fayo-dhawrka xabsiyada guud ahaan ama xabsiyo cayiman iyo maamulka, gacan-ku-haynta, ammaanka, dhaqan-celinta iyo caafimaadka maxaabiista iyo weliba maamulka saraakiisha xabsiyada, xubnaha iyo Ciidanka guud ahaan.

(2) Amarrada joogtada ah ee uu Taliyaha Ciidanku uu bixiyo si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobkan waxa ay dhammaystirayaan Xeer-nidaamiyeyaasha Wasiirku soo saaro iyadoo uu raacayo qodobka 94aad ee Xeerkan, haddii se iska-hor-imaad ku yimaaddo amar joogto ah oo Taliyaha Ciidanku soo saaray iyo Xeer-nidaamiyaha Wasiirku soo saaray, amarka joogtada ah waxa lagaga dhaqmayaa ilaa inta uu ka waafaqsan yahay Xeer-nidaamiyaha, inta uu ka khilaafsan yahayna waxa loo raacayaa sida lagu jideeyey Xeer-nidaamiyaha.

(3) Amarrada joogtada ah ee uu Taliyaha Ciidanku u bixiyey si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobkan waxa lagu cayimi karaa laguna maamuli karaa xushmayno iyo xuquuqo gaar ah oo loo fidiyey maxaabiis waana lagu qaadi karaa.

(5) Taliyaha Ciidanku wuxuu amarrada gaarka ah ee ku xusan faqradaha sare ee Qodobkan u baahinayaa sida uu u arko in ay lagama maarmaan ugu tahay ku-war-gelinta iyo ogeysiinta saraakiisha xabsiyada, xubnaha kale, dadka soo booqanaya xabsiyada iyo maxaabiista ay amarradu saamaynta ku leeyihiin.

(6) Taliyaha Xabsigu, markuu helo amar lagu soo saaray si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobkan, wuxuu qaadayaa tallaabada macquulka ah ee amarka gaarka ah lagu gaadhsiinayo maxbuuska aan fahmayn afka Soomaaliga ama aan aqoon akhris/qoristiisa.

## Qodobka 15aad
## Magacaabista Taliyaha Xabsiga iyo Taliye-Ku-Xigeenka Xabsiga

(1) Taliyaha Ciidanku wuxuu xabsi kasta u magacaabayaa Taliye Xabsi iyo Taliye-ku-Xigeen, isagaana xilka ka qaadi kara.

(2) Sarkaalka loo magacaabo Taliyaha Xabsigu wuxuu madax ka noqonayaa xabsiga loo magacaabay, waxaanu Taliyaha Ciidanka mas'uul uga yahay maamul-wanaagga, kala-dambaynta iyo ammaanka xabsigaas.

(3) Taliye-Xigeenka Xabsigu wuxuu ka kaalinayaa Taliyaha Xabsiga hawlaha la xidhiidha maamul-wanaagga, kala-dambaynta iyo ammaanka xabsiga, waxaanu xilka ku sii simayaa Taliyaha Xabsiga marka uu xabsiga ka maqan yahay;

(4) Marka Taliyaha Xabsiga iyo Taliye-Ku-Xigeenka xabsigu isku mar ka maqan yihiin xabsiga, waxa labadooda ka madaxnimada xabsiga ku dambeeyaa u sii xil-saarayaa Ku-Simaha Taliyaha Xabsiga :

- b) sarkaalka xabsi ee ugu sarreeya xagga darajada;
- t) haddii laba sarkaal xabsi ama ka badani ay ka sinmaan xagga darajadana, waxa Ku-Simaha Taliyaha Xabsiga loo xil-saarayaa sarkaalka xabsi ee shaqada ku soo horreeyey.

## Qodobka 16aad
## Mas'uuliyadda Taliyaha Xabsiga

1) Taliyaha Xabsiga ayaa Taliyaha Ciidanka uga mas'uul ah dhammaan hawlaha xabsiga.

2) Taliyaha Xabsigu isagoo raacaya xeerka Xabsiyada & xeer-nidaamiyhiisa, tilmaamaha iyo amarrada madaxda sare wuxuu mas'uul ka yahay habsami-u-maamulidda xabsiga taas oo lagu xaqiijinayo: -
   b) sugidda ammaanka xabsiga iyo maxaabiista,
   t) xabsi-ku-haynta maxaabiista muddada xadhiggooda la jideeyey,
   j) daryeelidda maxaabiista iyo ilaalinta nolosha iyo caafimaadka maxaabiista,
   x) xirfad/akhris/qoraal-barista maxaabiista iyo toosinta hab-dhaqankooda si ay ugu noqdaan bulshada iyagoo sii wadan kara nolol mas'uuliyadi ku dheehan tahay,
   kh) dhawridda xuquuqda maxaabiista (Xuquuqda Aadaminimo iyo xuquuqda qofka Xuriyada laga qaaday.
   d) habsami-u-diiwaan-gelinta maxaabiista si loola socdo tirada sannad kasta soo gasha xabsiga;

3) Taliyaha Xabsiga ayaa ka mas'uul ah baxsasho kasta oo uu ku kaco maxbuus ku jirey xabsiga uu taliyaha ka yahay, haddii aan masuuliyadu si buuxda ugu wareegin Sarkaal Xabsi ama xubin ciidan, si waafaqsan Xeerkan ama xeer-nidaamiyahiisa.

4) Taliyaha Xabsigu wuxuu siin karaa saraakiisha xabsiga iyo maxaabiista amarrada uu u arko in ay lagama maarmaan u yihiin maamul wanaagga, kala-dambaynta iyo ammaanka xabsiga uu taliyaha ka yahay.

5) Taliyaha Xabsigu wuxuu oggolaan karaa isticmaalka xoogga uu sida macquulka ah u aamino in uu lagama maarmaan u yahay in uu ku meel-mariyo amarradiisa sharciga ah ee uu ku xaqiijinayo jiritaanka maamul wanaagga, kala-dambaynta iyo ammaanka xabsiga; waxaana sharci ah in sarkaal xabsi u adeegsado xoog sida loogu oggolaaday.

6) Taliyaha Xabsigu wuxuu u gudbinayaa Taliyaha Ciidanka warbixin bil-leh ah oo uu si faahfaahsan ugu xusay shaqaaqooyinka waaweyn, booqashooyinka muhiimka ah, dembiyada yar-yar iyo kuwa culus ee lagu galay xabsiga, tirada maxaabiista iyo xaaladdooda sharciyeed, iyo wararka kale ee loo baahdo.

## Qodobka 17aad
## Habraacyada Maamulka Xabsiga

1) Taliyaha Xabsigu wuxuu soo saari karaa habraacyo maamul oo qoraal ah oo la xidhiidha maamulka iyo shaqada joogtada ah ee xabsiga waxaana oggolaanaya Taliyaha Ciidanka.

2) Haddii ay iska hor-yimaaddaan:-

b) Amar joogta ah oo uu soo saarey taliyaha Ciidanku iyo habraac maamul oo uu Saarey taliye xabsi waxa la raacayaa amarka joogtada ah ee taliyaha Ciidanka

t) Amarada iyo habraac maamul oo uu soo saaray taliye xabsi waxaa la raacaya Xeer-nidaamiyaha.

3) Taliyaha Xabsigu wuxuu qaadayaa tallaabo kasta oo lagama maarmaan ah si uu habraacyada maamul ee uu soo saaray ugu war-geliyo saraakiisha xabsiga, xubnaha, dadka xabsiga soo booqanaya iyo maxaabiista xabsiga ku xidhan.

4) Taliyaha Xabsigu wuxuu qaadayaa tallaabo kasta oo lagama maarmaan ah oo uu habraacyada maamul ee uu soo saaray, ilaa xadka ay ka khuseeyaan maxaabiista, uu:-

b) kula socodsiiyo maxbuus kasta oo aan akhris/qorista aqoon,
t) kula socodsiiyo luuqadda uu fahmayo maxbuus kasta oo aan fahmayn afka Soomaaliga.

## Qodobka 18aad
## Magacaabista Saraakiisha Xabsiga

(1) Taliyaha Ciidanku, isagoo raacaya Xeerka Ciidanka, wuxuu u xil-saari karaa xabsiyada tirada saraakiisha xabsi ee lagama maarmaanka u ah xaqiijinta ujeeddooyinka xeerkan.

(2) Marka fal-dembiyeed uu ku caddaado Sarkaal xabsi, iyadoo loo raacay xeer aan ahayn Xeerkan, laakiin la xidhiidha xil-gudashadiisa Sarkaal xabsi ahaan ama ku habboonaantiisa haynta xafiis, Taliyaha Ciidanku wuxuu shaqada ka saari karaa sarkaalka xabsi si waafaqsan Xeerka Ciidanka iyo Xeer-nidaamiyahiisa.

## Qodobka 19aad
## Awoodda iyo Waajibaadka Sarkaal Xabsi

Sarkaal xabsi wuxuu:

(1) mas'uul ka yahay in uu sugo ammaanka xabsiga, halka looga xilsaaro in uu ka shaqeeyo;

(2) mas'uul ka yahay baxsashada maxbuus isaga la hoos-geeyey ama uu ilaalintiisa u xil-saarraa mar uu shaqada lahaa;

(3) u hoggaansamayaa dhammaan amarrada sharciga ah ee uu siiyo Taliyaha Xabsigu ama sarkaal xabsi ee xukuma ama kormeer ku leh, iyo weliba amarrada iyo tilmaamaha Taliyaha Ciidanka.

(4) siin karaa maxbuus amarrada lagama maarmaanka u ah xaqiijinta ujeeddooyinka Xeerkan, sida ammaanka, kala-dambaynta, ama maamulidda xabsiga; waxaanu adeegsan karaa xoogga ugu muuqda in uu macquul yahay ee lagama maarmaanka u ah in uu sugo in amarradiisa ama amarrada kale ee sharciga ah loo hoggaansamay.

## Qodobka 20aad

## Magacaabista iyo Mas'uuliyadda Madaxa Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhawaynta ee Xabsiga

(1) Taliyaha Ciidanku, ka-dib marka uu la tashado Taliyaha Xabsiga, tixgelinayana aqoonta gaarka ah ee looga baahan yahay mas'uulkan, wuxuu magacaabayaa Madaxa Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhaweynta Xabsiga.

(2) Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhaweynta Xabsigu wuxuu yeelan karaa diiwaannadan soo socda:

- b) Diiwaanka Garsugeyaasha,
- t) Diiwaanka Racfaannada,
- j) Diiwaanka Xukumaneyaasha xukunkoodu noqday kama-dambaysta,
- x) Diiwaanka Booqashooyinka,
- kh) Diiwaanka Dacwadaha iyo Anshaxa,
- d) Diiwaanka Caafimaadka,
- r) Diiwaanka lacagta, Alaabta yar-yar ee Qiimaha leh iyo Dharka Maxaabiista,
- s) Diiwaanka Geerida,
- sh) Diiwaanka xidhidda iyo furidda,
- dh) Diiwaanka Dhacdooyinka (Occurrence Book),
- c) Diiwaanka Raashinka,
- g) Diiwaanada kale ee lama huraan noqda.

(3) Taliyaha Xabsigu, ka dib markuu la tashado Taliye-Xigeenka iyo Madaxa Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhaweynta xabsiga, wuxuu magacaabayaa saraakiil mas'uul ka kala noqda diiwaannada xafiiska Tirada iyo Soo-Dhaweynta xabsiga, tiradooduna ay tahay hadba inta loo baahdo.

(4) Madaxa Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhaweynta Xabsigu wuxuu mas'uul ka yahay guud ahaan diiwaannada kala duwan ee Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhaweynta ee Xabsiga, waxaana mas'uuliyaddiisa ka caawinaya Diiwaan-hayeyaasha kala duwan.

(5) Madaxa Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhaweyntu wuxuu ku qorayaa ama hubinayaa in lagu qoro diiwaannada kala duwan dhammaan macluumaadka loogu talagalay diiwaan kasta ee la xidhiidha maxbuuska, waxaanu si aan dib-u-dhac lahayn u gudanayaa waajibaadka ka saaran u-suurto-gelinta maxbuuska xuquuqda xeerarku u waajibiyeen, sida:

- b) ku-wargelinta maxbuuska in uu xaq u leeyahay in uu qabsado qareen iyo la xidhiidhintiisa qareenka uu doonayo in uu u wakiisho dacwaddiisa, haddii aanu qareen qabsan karinna uu la xidhiidhiyo hay'adaha bixiya kaalmada sharciga;
- t) ka-ilaalinta maxbuuska in uu ku-muddo-dhaafo garsugenimada;
- j) u-qoridda maxbuuska la xukumay racfaanka uu codsado, iyada oo laga taxadirayo in

ay ka dhacdo muddada loo oggol yahay in uu ku dalbado racfaan;

x) hubinta u-diiwaan-gelinta maxbuuska buka xaaladdiisa caafimaad, kulammada uu la yeeshay Sarkaalka Caafimaadka ama dhakhtarka iyo daweynta la siiyey,

kh) u-diiwaan-gelinta maxbuuska fal-dembiyeedyada uu geysto muddada uu xabsiga ku jiro iyo tallaabada laga qaaday,

d) maamulidda iyo diiwaangelinta booqashooyinka loogu yimaaddo maxbuuska,

r) u-ilaalinta maxbuuska xukuman taariikhda uu xabsiga ka baxayo, iyo

s) arrintii kasta ee kale ee diiwaan-gelinteeda lagu jideeyo xeer, amarrada joogtada ah ama amarrada gaarka ah.

(6) Lacagta maxaabiista iyo alaabta yar-yar ee qiimaha leh waxa lagu xafidayaa khasnadda xafiiska Taliyaha Xabsiga.

(7) Marka maxbuusku codsado in lacagta loo hayo looga soo iibiyo shay aan maamnuuc ahayn, Madaxa Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhaweyntu wuxuu Taliyaha Xabsiga u soo diyaarinayaa nidaam-xisaabeedka maxbuuska lagu siinayo, diiwaankana lagaga saarayo lacagta uu soo codsaday, iyada oo ka saarista diiwaanka ee lacagtaa laga saxeexayo mabuuska lacagta leh.

(8) Madaxa Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhaweyntu waxa kale oo uu mas'uul ka yahay diiwaan-gelinta lacagta, alaabta yar-yar ee qiimaha leh, dharka iyo dhamaan alaabta kale ee ay leeyihiin maxaabiistu ee lagu aaminay, waana in uu tiriyo, iyada oo marag leh, laguna qoro diiwaanka loogu talagalay tirada lacagta, dharka ama alaabta kale, khaanadda la dhigay dharka ama alaabta iyo markhaatiyada tirada alaabta goob-joogga u ahaa iyo saxeexa maxbuuska leh lacagta, dharka ama alaabta kale.

(9) Haddii alaab laga diiwaan-geliyey Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhaweynta la waayo ama khasaare gaadho, Taliyaha Xabsigu:

b) waxa uu hubinayaa khasaaraha dhacay iyo cidda gaar ahaan uga masuulka ah arintaas,

t) Marka uu Taliyaha Xabsigu xaqiijiyo sarkaalka xabsi ama xubinta ciidan ee mas'uulka ka ah dhibaatada dhacday, wuxuu maxbuuska u mag-dhebayaa khasaaraha gaadhay alaabtiisa, waxaanu si tartiib ah uga jarayaa mushaharka sarkaalkaa xabsi ama xubintaa ciidan qiimaha khasaaraha ku yimi alaabta ee loo mag-dhebey maxbuuska.

(10) Waajibaadka iyo mas'uuliyadda Diiwaan-Hayaha Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhaweynta xabsiga waxa lagu faahfaahinayaa xeer-nidaamiyaha Xeekan, si waafaqsan Xeerkan..

## Qodobka 21aad
## Magacaabista Saraakiisha aan Ahayn Saraakiil Xabsi

(1) Waxa Xeerkan lagu magacaabi karaa saraakiisha caafimaad, saraakiisha maamul, macallimiinta iyo saraakiisha kale, ee aan ahayn saraakiisha xabsi ee loo hawl-geliyey si waafaqsaqn qodobka 18aad ee Xeerkan, ee loogu baahdo si loo xaqiijiyo ujeeddooyinka Xeerkan.

(2) Si loo xaqiijiyo ujeeddooyinka Xeerkan, Taliyaha Ciidanku wuxuu qori karaa, kana hawl-gelin karaa xabsiyada shaqaale rayid ah, isagoo raacaya Xeerka Shaqaalaha Dawladda.

## Qodobka 22aad
## Magacaabista iyo Mas'uuliyadda Madaxa Bakhaarrada ee Xabsiga

(1) Taliyaha Xabsigu, ka dib markuu la tashado Taliye-Xigeenka Xabsiga, wuxuu magacaabayaa Madaxa Bakhaarrada Xabsiga.

(2) Madaxa Bakhaarrada Xabsigu wuxuu hoos imanayaa Madaxa Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhaweynta ee xabsiga.

(3) Madaxa Bakhaarrada Xabsigu waxa uu masuul ka yahay xafidaadda iyo maamulidda raashinka maxaabiista iyo hantida kale ee la dhigo bakhaarrada uu mas'uulka ka yahay.

## Qodobka 23aad
## Ka-Qaadista Maxbuuska Sawir Kur ah iyo Raadka Faraha

Marka ay farsamo ahaan ugu suurto-geleyso, Taliyaha Xabsigu wuxuu amrayaa in maxbuuska marka xabsiga la keeno laga qaado sawir kurka ah oo soo jeed iyo gudub ah iyo weliba raadka faraha (finger prints).

## Qodobka 24aad
## Buugaagta iyo Dhokumentiga Muhiimka ah

Taliyaha Xabsigu wuxuu xafidayaa buugaagta, dhakumentiga, **qoraalada,** joornaallada IWM ay ku qoran yihiin xeerarka, wareegtooyinka, amarrada, anshax-marinaha iyo aragtiyaha kormeerayaasha.

## Qodobka 25aad
## Ciidammada Xoojinta Hawlaha Ciidanka Asluubta

(1) Xaaladaha uu Ciidanka Asluubtu ku fillaan waayo nabad-gelyada iyo maamulka xabsiga ama hawl-gallada maxaabiis loogu wareejinayo xabsi kale, waxa si ku-meel-gaadh ah loogu xoojin karaa xubno ka tirsan ciidammada kale ee Somaliland sida Booliiska iyo Ciidanka Qaranka (milateriga).

(2) Xubinta ka tirsan Ciidammada Booliiska ama Ciidanka Qaranka ee lagu xoojiyey Ciidanka Asluubta, muddada ay la hawlgeleyso Ciidanka Asluubta waxa saaran xilka iyo waajibaadka xubinta dhiggeeda ah ee Ciidanka Asluubta, iyada oo yeelanaysaa awoodda ay leedahay xubinta dhiggeeda ah ee Ciidanka Asluubtu, waxaana lagu dhaqayaa xeerarka iyo amarrada khuseeya Ciidanka Asluubta.

## Qodobka 26aad
## Waajibaadka Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud ee la Xidhiidha Xabsiyada

(1) Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud wuxuu sameeyaa kormeerrada xabsiyada ee uu lagama maarmaanka

u arko ee uu ku hubinayo daryeelka la siiyey maxaabiista iyo in loola dhaqmay si sharciga waafqsan.

(2) Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud markuu u arko inay ku habboon tahay, wuxuu baadhis ku samayn karaa xabsiyada iyo maxaabiista, waxaanu su'aalo weydiin karaa maxaabiista.

(3) Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud wuxuu qoraal gaaban, oo la xidhiidha dhalliilaha ka jira xabsiga iyo tilmaamaha uu ka bixinayo sixitaankooda, ku qori karaa buugga xabsiga.

(4) Taliyaha Xabsigu wuxuu si aan dib-u-dhac lahayn ugu gudbinayaa Taliyaha Ciidanka waxa uu masuulka Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud ku qoray buugga xabsiga, iyo tallaabooyinka uu Taliye Xabsi ahaan ka qaaday ama soo jeedinayo in laga qaado.

## QAYBTA 4[AAD]
## HAYNTA, KALA SAARIDA. WAREEJINTA IYO SII-DEYNTA MAXAABIISTA

### Qodobka 27[aad]
### Soo-Gelinta Maxaabiista

(1) Marka laga reebo maxbuus laga soo wareejiyay xabsi shisheeye si waafaqsan Xeerka Wareejinta Maxaabiista, maxbuus waxaa xabsiga lagu soo gelin karaa amar garsoore ama xadhig jideeye ka soo baxay maxkamad awood u leh oo keliya.

(2) Maxbuus kastaa, haddii uu garsuge yahay ama xukumane yahay, waa in uu yeesho xadhig jideeye ka soo baxay maxkamad awood u leh oo loo soo gooyey intaanu xabsiga la keenin maxbuuska.

(3) Maxbuus kasta oo xukumane ah waxaa xukun jideeyihiisa wehelinaya sawirka maxbuuska oo kur ah oo loo soo raacinayo sida xeer-nidaamiyaha lagu faahfaahiyo.

(4) Taliyaha Xabsigu wuxuu hubinayaa in maxbuusku yahay ka lagu sheegay xadhig-jideeyaha lagu keenay maxbuuska, waxaanu xabsiga ku haynayaa ilaa maxbuuskaasi uu si sharciga waafaqsan uga baxayo xabsiga.

(5) Xadhig-jideeyaha waa in ay ku qorraato:
- b) magaca maxkamadda uu ka soo baxay xadhig-jideeyuhu.
- t) taariikhda la qoray jideeyaha,
- j) magaca saddexan ee qofka uu xadhig-jideeyuhu jideynayo iyo magaca buuxa ee hooyadii,
- x) da'da qofka xadhiggiisa la jideynayo,
- kh) muddada xadhigga ee la jideeyey,
- d) magaca iyo saxeexa garsooraha soo saaray,
- r) shaambadda maxkamadda garsooruhu ka tirsan yahay ee awoodda u leh soo-saaridda xadhig-jideeyaha,
- s) arriintii kale ee lagu jideeyo xeerkan ama xeer kale.

(6) Xadhig-jideeyaha waxa lagu hagaajinayaa Taliyaha Xabsiga; xadhig-jideeyaha lagu hagaajiyey cid aan ahayn Taliye Xabsi, ka hor intaan Xeerkani dhaqan-gelin, waxa Xeerkani u aqoonsanayaa in xabsigu ku qabtay, ku hayey kuna sii haynayo sifo sharci ah.

(7) Haddii xadhig-jideeyaha ay ka maqan tahay arrin xeerku jideeyey, ama khalad ka muuqdo, Taliyaha Xabsigu wuu celin karaa maxbuuska, haddii se uu lama huraan u arko in maxbuuska uu qabto, wuxuu marka ugu horraysa ee suuro-galka ah u geynayaa xadhig-jideeyaha khaldan maxkamaddii soo saartay si loo soo saxo ama loo soo dhammaystiro, inta la soo saxayo ama la soo dhammaystirayo xadhig-jideeyahana wuxuu maxbuuska ku sii haynayaa Xafiiska Tirada iyo Soo-dhawayanta ama xero-guusha.

(8) Haddii laga fursan waayo in la xidho haweeney sidata ilmo yar oo nuujinteeda lagala maarmi waayey, waxa ilmaha yar ee la oggolaaday in ay haweeneydu xabsiga la gasho lagu xusayaa xadhig-jideeyaha, iyadoo dharka iyo waxyaalaha kale ee lagama maarmaanka u ah ilmaha yar laga bixinayo kharashka dawladda.

(9) Xadhig-jideeyaha waxa la raacinayaa maxbuuska marka loo beddelayo xabsi kale ama maxkamad la horgeynayo.

## Qodobka 28aad
## Soo-Dhaweynta iyo La-Kulanka Koowaad ee Maxbuuska

(1) Marka taliyaha Xabsigu ogolaado in Maxbuuska xabsiga lagu xidho isagoo gudanaya Wajibaadyada ku xusan Qodobka 27aad farqadihisa 4aad iyo 5aad waxa uu maxbuuska ku I wareejinayaa xafiiska tirade iyo soo dhoweynta Xabsiga.

(2) Marka sarkaalkaTirada iyo Soo-dhaweynta xabsigu uu helo amarka taliyaha xabsiga , waxa lala yeelanayaa maxbuuska waraysi lagu weydiinayo su'aalo la xidhiidho da'diisa, goobta dhalashadiisa, taariikh-nololeedkiisa, heerkiisa aqooneed/xirfadeed iwm; waxaana maxbuuska loogu sheegayaa kulankaas xuquuqdiisa, hab-nololeedka xabsiga, hab-dhaqanka maxbuuska laga doonayo, xeerarka xabsiga, amarrada joogtada ah iyo kuwa gaarka ah.

(3) Maxaabiista Ciidanka Booliiska ama Asluubta iyo xubnaha Garsoorka ee ay khatar ama cadaawadi kaga iman karto maxaabiis kale, Taliyaha Xabsigu wuxuu iska saarayaa xil gaara oo la xidhiidha amaankooda iyo badbaadadooda.

## Qodobka 29aad
## Qaybaha Xabsiga iyo Kala-Saarista Maxaabiista

(1) Xabsigu wuxuu yeelan karaa qaybta ragga, qaybta haweenka iyo qaybta carruurta.

(2) Xabsiyada leh qaybaha ku xusan faqradda (1) ee Qodobkan, maxaabiista waxa loo kala saarayaa rag, haween iyo carruur, iyadoo caruurta loo sii kala saarayo lab & dheddig.

(3) Maxaabiista ragga ah iyo kuwa haweenka ah waxa lagu kala haynayaa meelo kala duwan oo aanay iskaga gudbi karin, iskana arki karin.

(4) Qayb kasta oo ka mid ah qaybaha ku xusan faqradda (2) ee qodobkan, waxa xabsi-ku-hayntooda u xilsaaran xubno Ciidanka Asluubta ah oo la jinsi ah.

(5) Xabsi kasta oo leh qaybta haweenka, waxa qaybta haweenka si gaar ah ugu xilsaaran sarkaal haweeney ah oo Taliyaha Xabsiga uga mas'uul ah ilaalinta iyo dhaqan-toosinta maxaabiista haweenka ah.

## Qodobka 30aad
## U-Kala-Saarista Maxaabiista Qaybo

Si loo ilaaliyo korna loogu qaado hab-dhaqankooda, loona fududeeyo tababarkooda, isla markaana loo

yareeyo khatartooda, waxa maxaabiista loo kala saarayaa qaybahan hoos ku qoran:

(1) Maxaabiista carruurta ah waxa laga soocayaa kuwa da'-yaraha ah iyo kuwa da'da weyn;

(2) Maxaabiista aan hore dembi u gelin waxa laga soocaya kuwa dembiga ku soo noqnoqda iyo caadeysteyaasha.

(3) Maxaabiista garsugeyaasha ah waxa laga soocayaa kuwa xukumaneyaasha ah.

(4) Maxaabiista xadhig-yaraha ah waxa laga soocayaa kuwa xadhig-dheeraha ah iyo.kuwa dilka ku xukuman.

(5) Maxaabiista cudurrada la kala qaadi karo qaba waxaa laga soocayaa maxaabiista fayaw.

(6) Noocyadii kale ee loo sii kala saari karo

## Qodobka 31aad
## Haynta iyo Ilaalinta Sharciga ah ee Taliyaha Xabsiga

(1) Maxbuus kasta oo ku jira xabsi, wuxuu hoos imanayaa haynta iyo ilaalinta sharciga ah ee Taliyaha Ciidanka .

(2) Maxbuus kasta, marka laga qaadayo ama lagu sii wado xabsi ama mar kasta oo uu ka shaqaynayo meel debedda ka ah xabsiga amaba uu ku sugan yahay meel ka baxsan xuduudda xabsiga isagoo gudanaya hawl la oggolaaday, waxa loo aqoonsanayaa in uu ku jiro haynta sharciga ah ee Taliyaha Ciidanka.

(3) Dhammaan maxaabiista marka beddel lagaga qaadayo xabsi oo mid kale loo qaadayo waxa la raacinayaa ilaalo gelbis ah.

(4) Waajibaadka ilaalada gelbiska ah ee ku xusan faqradda (3) ee Qodobkan waxa lagu caddaynayaa amarrada joogtada ah.

## Qodobka 32aad
## Wax-Ka-Beddelka Xadhig-Jideeyaha

(1) Mar kasta oo maxkamad awood u lihi ay wax ka beddesho xadhig-jideeyaha maxbuus xabsiga ku jira, waxa Taliyaha Xabsiga loo gudbinayaa xadhig-jideeyaha dambe.

(2) Haddii uu Taliyaha Xabsigu aanu helin xadhig-jideeyaha dambe, wuxuu maxbuuska ku haynayaa xadhig-jideeyihii hore.

## Qodobka 33aad
## Horgeynta Maxaabiista Maxkamadda Awoodda u Leh

(1) Taliyaha Xabsigu markuu helo amarka uu ku saxeexan yahay guddoomiyaha ama garsoore ka tirsan maxkamadda awoodda u leh dhegeysiga dacwadda maxbuuska magaciisu ku xusan yahay amarka, ee lagu amrayo Taliyaha Xabsiga in maxbuuska la hor-keeno maxkamadda xilli lagu sheegay amarka, wuxuu maxbuuskaa hor-geynayaa maxkamadda xilligaa.

(2) Haddii maxbuuska ku xusan faqradda (1) ee qodobkani uu xabsiga ugu jirey garsuge ahaan, waxa maxkamad hor-geyntiisa u xilsaaran Taliyaha Saldhigga Booliiska ama Waaxda Dembi-baadhista ee dacwadda maxbuuska gacanta ku haysa; haddii se maxbuuska uu ku dhacay xukunkii maxkamadda darajada koowaad, waxa darajooyinka maxkamadaha ee kale maxkamad-hor-geyntiisa u xilsaaran Taliyaha Xabsiga.

(3) Maxbuuska amar sharci ah lagu hor-geeyey maxkamad, marka laga reebo maxbuuska garsugaha ah, waxa loo aqoonsanayaa in uu ku jiro haynta sharciga ah ee Taliyaha Ciidanka muddada uu kaga maqan yahay xabsiga ujeeddada ku xusan amarka sharciga ah.

(4) Maxbuus kasta oo garsuge ah oo muddadii xadhig-jideeyuhu hayntiisa jideeyey ay ka dhammaato, wuxuu Taliyaha Xabsigu u diyaarinayaa in maxkamad la hor-geeyo, waxaanu xusuusinayaa Taliyihii Saldhigga ama Madaxa Waaxda Dembi-baadhista, ee dacwaddiisa gacanta ku hayey, xaaladda sharci ee maxbuuska; haddii uu Taliyaha Xabsigu u arko in aan maxbuuska cid maxkamadda geysaa u soo socon wuxuu ku wargelinayaa arrinta maxbuuska maxkamaddii soo xidhay intaanay dhammaan saacadaha shaqada ee maalinta maxbuuska la horgeyn lahaa maxkamadda.

(5) Marka maxbuus xukuman xadhig-jideeyihiisa lagu sheego ganaax ama bixin xuquuq madani ah, haddii ganaaxa oo aan la bixin la gaadho dhammaadka muddada xadhigga, waxa ganaaxa loogu beddelayaa xadhig u dhigma; haddii se xadhiggu dhammaado iyadoo aan la bixin xuquuqdii madaniga ahayd, Taliyaha Xabsigu wuxuu maxbuuska, 14 cisho ka hor maalinta uu xabsiga ka baxayo, horgeynayaa Maxkamadda awoodda u leh si ay u suurto geliso in maxbuusku ka baxo xabsiga maalinta ciqaabta lagu xukumay ka dhammaato, bixinta xuquuqda madaniga ahna loogu maro nidaamka sharcigu u jideeyey.

## Qodobka 34aad
## Sii-Deynta Maxbuuska

*(1)* Taliyaha Xabsigu isaga ayaa ka mas'uul ah in uu maxbuuska xabsiga ka sii daayo isla marka uu xabsi-ka-sii-deynta yeesho, isagoo ogeysiin qoraal ah u gudbinaya xeer-ilaaliyaha iyo maxkamadii qoraalka xukunku uga yimi**.**

(2) Marka laga reebo xaaladda lagu sheegay faqrafa 4aad ee Qodobka 30aad maxbuuska xukuman wuxuu sii-deyn xaq u yeelanayaa:

b) marka ay dhamaato muddada xadhiggiisu si waafaqsan xeerkan,
t) marka uu ka faa'iidaysto cafis guud ama saamaxaad gaar ah si waafaqsan Xeerkan, xeer-nidaamiyaha, Xeerarka Ciqaabta iyo habka ciqaabta,
j) marka lagu sii-daayo sii-deynta shuruudaysan si xeerkan iyo xeer-nidaamiyihiisa waafaqsan,

x) Marka Taliyaha Xabsiga ay soo gaadho amar sii-deyn oo ka soo baxay maxkamad awood u leh.

(3) Maxbuuska xukuman waxa xabsiga laga sii deynayaa gelinka hore ee maalinta xabsi-ka-sii-deynta uu u leeyahay, haddii se ay maalintaasi ku hagaagto Jimce ama maalin nasasho qaran ah, amaba ay sii-deynta maxbuusku sugantay xilli gelin dambe ah, waxa maxbuuska laga sii deynayaa xabsiga gelinka hore ee maalinta shaqo ee ugu soo xigta.

(4) Maxbuuska daweyni uga socoto sarkaal caafimaad xilliga xabsi-ka-sii-deyntiisu soo gasho, waxa loo wareejinayaa cusbitaal ama goob bulsho, marka ay suurto-gal tahay, halkaas oo uu ka sii wadan karo daweyntiisa, isagoo xor ah.

(5) Maxaabiista Xadhigoodu ka sareeyo 7 sano ama u xidhn dambiyada argagixiso ama budhcad badeed marka xadhigoodu ka hadhsan yahey saddex bilood waa in warbixin lagu wargalinayaa xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka, loona sheego in maxbuus xadhigiisii ka sii dhamaanayo.

**Qodobka 35aad**
**Taakulaynta Maxbuuska Xabsiga Laga Sii Daayey**

(1) Marka ay soo gasho xabsi-ka-sii-deynta maxbuus uu hayo cudurka dhimirku, waxa Taliyaha Xabsiga la gudboon in uu maxbuuskaas u fidiyo taakulayn u suurto-geliso in uu ku gaadho gurigiisa si nabadgelyo ah.

(2) Maxbuuska waxa laga sii deynayaa, haddii uu isagu doorto, suurtogalna ay tahay, xabsi ku yaalla degaankiisa.

(3) Maxbuuska laga sii-daayo xabsi ku yaalla degmo aan ahayn degaankiisa, haddii uu codsado, waxa lagu gaadhsiinayaa degmadiisa kharash dawladeed iyadoo la siinayo nooli si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha Xeerkan.

(4) Iyadoo looga dan leeyahay in laga hortago ku-noq-noqoshada fal-dembiyeedyada, maxbuuska xadhig dheeraha ah ee laga sii daayo xabsiga ee caafimaad-xumo darteed ku yeelan waayey abaal-gud, isla markaana aan haysan wax nooli ah, waxa awoodda Taliyaha Xabsiga ah in uu noolyo si waafaqsan xeer-nidaamiyaha.

**Qodobka 36aad**
**Xadhig-Dhimista Maxbuuska**

(1) Maxbuuska xadhig ku xukumani wuxuu dhaqan-wanaaggiisa muddada uu xidhan yahay ku mutaysan karaa xadhig-dhimis dhan saddex meelood meel ($^1/_3$) xadhiggiisa.

(2) Iyadoo laga duulayo talada Taliyaha Ciidanka iyo soo-jeedinta Xeer-ilaaliyaha Guud, Madaxweynuhu wuxuu bixin karaa xadhig-dhimis dheeraad ah oo ku salaysan arrimo gaar ahaaneed oo ay ka mid yihiin xanuun aan dawo lahayn oo dilaa ah oo maxbuuska haya,

kaalmaynta socodsiinta cadaaladda iwm.

(3) Iyadoo looga dan-leeyahay fulinta faqradaha qodobkan, waxa maxbuuska marka xabsiga lagu qaabilo lagu wargelinayaa muddada xadhig-dhimista buuxda ee uu dhaqan-wanaaggiisa ku heli karo dhammaadka xadhiggisa, in lagala noqon karo iyo sababaha keeni kara in lagala noqdo.

(4) Iyadoo uu go'aankeeda leeyahay Taliyaha Ciidanku, maxbuusku wuxuu ku waayi karaa xabsi dhimistiisa dembi uu xabsiga ku galay ama ka-qayb-gelid-la'aan barnaamijyada dhaqan-celinta, mana yeelanayo xadhig-dhimis muddada:-

i. uu ugu jiro cusbitaal khalad isaga ka yimi ama is-bukaysin been ah; ka dib marka dhakhtar caddeeyo ama.

ii. uu ku jiro gaar-u-xidhid loogu soo rogey ciqaab ahaan.

(5) Taliyaha Ciidanku wuxuu awood u leeyahay soo-celinta, qayb ahaan ama gebi ahaanba, xadhig-dhimista laga qaaday maxbuuska, markuu xaqiiqsado in hab-dhaqankii maxbuusku hagaagay.

## Qodobka 37aad
## Sii-Deynta Shuruudaysan

(1) Maxbuus kasta oo ku xukuman xadhig sannad ah ama ka badan, oo aan u xidhnayn dil, argagixiso, budhcad-badeed, dhac-hubaysan, kufsi, dembiyada lidka qarannimada ama lidka maamulka guud, waxa markuu dhammaysto kalabadh ($^1/_2$) xadhiiggiisa uu heli karaa sii- deyn shuruudaysan.

(2) Maxbuuska xaqa u leh sii-deynta shuruudaysan, ka hor intaan loo oggolaan sii-deynta waxa laga doonayaa in uu buuxiyo shuruudo lagu qeexi doono xeer-nidaamiyaha Xeerkan, waxa kale oo uu saxeexayaa ballan-qaad in uu raaci doono hab-dhaqan lagu jideyn doono xeer-nidaamiyaha Xeerkan.

(3) Taliyaha Ciidanka ayaa magacaabaya guddiyada iyo kormeereyaasha sii-deynta shuruudaysan.

(4) Maxbuuska xabsiga kaga baxay sii-deynta shuruudaysan ee u dhaqmi waaya hab-dhaqanka loogu talo-galay, wuxuu galay dembiga baxsasho maxbuus, waxaana lagu soo xidhayaa xadhig-jideeye la'aan.

(5) Dacwadaha la xidhiidha fal-dembiyeedka ku xusan faqradda (4) ee qodobkan, waxa xafiiska xeer-ilaalintu ku oogayaa maxbuuska markuu helo warbixinaha kormeeraha sii-deynta shuruudaysan iyo Taliyaha Xabsiga, iyadoo maxkamadda awoodda u lihi u aqoonsanaysa warbixinahaas caddaymo ahaan.

## Qodobka 38aad
## Cafiska iyo Saamaxaadda Maxaabiista

Cafiska & Saamaxaada waxa iska leh Madaxweynaha JSL, sida ku cad qoddobka 90aad Farqadiisa ( 5aad ) ee Dastuurka JSL.

## QAYBTA 5AAD
## MAAMULIDDA, GACAN-KU-HAYNTA IYO AMMAANKA XABSIGA

### Qodobka 39aad
### Baadhista Maxbuuska

(1) Maxbuuska waa la baadhayaa marka xabsiga la keeno iyo mar kasta oo kale oo ay Taliyaha Xabsiga ugu muuqato lagama maarmaan ama Taliyaha Ciidanku uu sidaa amro, waxaana maxbuuska baadhaya sarkaal xabsi oo la jinsi ah, iyadoo laga qaadayo shay kasta oo laga helo:
   b) oo lagu siiyey oggolaanshaha Taliyaha Xabsiga la'aantii;
   t) oo uu ku haystey oggolaanshaha Taliyaha Xabsiga la'aantii;
   j) oo, in kasta oo lagu siiyey ama uu ku haystey oggolaanshaha Taliyaha Xabsiga, haddana ugu muuqatay Taliyaha Xabsiga in uu khatar ku keeni karo ama uu gef ku yahay ammaanka iyo kala dambaynta xabsiga.

(2) Sarkaal xabsi wuxuu isticmaali karaa xoog inta macquul ahaan lagama maarmaanka u ah si uu u meel-mariyo waajibaadka lagu saaray faqradda (1) ee qodobkan.

(3) Sarkaalka xabsi ee qabta alaab sharci-darro ah isagoo fulinaya waajibaadka lagu saaray faqradda (1) ee qodobkan ama isagoo gudanaya mas'uuliyaddiisa sharciga ah, muu gelin dembi marka loo eego Xeerkan ama xeer kasta oo kale, haddii sarkaalka xabsi u qabtay alaabta si uu ugu wareejiyo Taliyaha Xabsiga.

(4) Taliyaha Xabsigu alaabta laga qaaday maxbuuska:
   b) wuxuu ku wareejinayaa booliiska, haddii ay alaabtu tahay alaab sharci-darro ah;
   t) wuxuu ku biirinayaa hubka iyo rasaasta xabsiga, waxaanu gelinayaa diiwaanka hubka iyo rasaasta ee xabsiga, haddii alaabtu tahay hub fudud ama rasaas hub fudud;
   j) wuxuu u haynayaa maxbuuska, kuna wareejinayaa markuu xabsiga ka baxayo, haddii alaabtu aanay sharci-darro ahayn ama aanay waxyeello ku ahayn xabsiga;
   x) wuxuu u celinayaa qofka ku dooday lahaanshihiisa ee ay u caddaatay, ama ugu muuqda Taliyaha Xabsiga in uu yahay qofkii lahaa;
   Kh) wuxuu amrayaa burburintiisa ama ugu talinayaa sidii kale ee habboon ee ay ugu muuqato, ee Sharciga Waafaqsan.

### Qodobka 40aad
### Xakamaynta Hab-Dhaqanka Maxbuuska

(1) Taliyaha Xabsigu wuxuu oggolaan karaa ama amri karaa in hab-dhaqanka maxbuuska la xakameeyo marka ay ugu muuqato in xakamayntu ay lagama maarmaan u tahay:-
   b) baajinta wax-yeello uu maxbuusku u geysanayo naftiisa ama cid kale;

t) tix-gelinta talo uu ka helay sarkaal caafimaad ama dhakhtar, sabab la xidhiidha daweyn caafimaad; ama

j) ka-hortagga baxsashada maxbuuska xilli maxbuuska laga qaadayo xabsiga ama lagu sii wado ama muddada uu si aan rasmi ahayn uga maqan yahay xabsiga.

(2) Xakamaynta hab-dhaqanka maxbuuska ee lagu fulinayo isticmaalidda dawo waxa loo adeegsan karaa oo qudha ujeeddo caafimaad iyadoo uu oggolaaday sarkaal caafimaad ama dhakhtar.

(3) Haddii xakamaynta hab-dhaqan maxbuus loo wadayo si joogteysan muddo ka badan 24 saacadood, isticmaalka xakamaynta hab-dhaqanka iyo duruufta la isticmaalayba si deg-deg ah ayuu Taliyaha Xabsigu war-bixin uga siinayaa Hogaanka Xabsiyada.

(4) Duruuf kasta oo jirta, xakamaynta looma isticmaali karo ciqaab ahaan.

(5) Noocyada xakamaynta ee la isticmaali karaa waa kuwa lagu jideeyey xeer-nidaamiyaha.

## Qodobka 41aad
## Gaar-U-Xidhidda Maxbuuska

(1) Si loo sugo kala-dambaynta iyo ammaanka xabsiga, Taliyaha Xabsigu wuxuu si qoraal ah ku amri karaa gaar-ugu-xidhidda xabsiga maxbuus muddo aan ka badnayn 21 cisho.

(2) Taliyaha Xabsigu wuxuu si dhakhso ah ugu war-gelinayaa Taliska guud amar kasta oo uu bixiyo isagoo raacaya faqradda (1) ee qodobkan.

(3) Maxbuus kasta oo gaar loo xidhay waa in uu hawo fiican iyo jimicsi helo muddo aan ka yarayn saacad maalin kasta, noqonaysana xilliga uu Taliyaha Xabsigu tilmaamo.

## Qodobka 42aad
## Isticmaalka Hubka Fudud

(1) Taliyaha Xabsiga, sarkaal xabsi ama xubin ciidan oo uu Taliyaha Ciidanku u xilsaaray ilaalinta maxbuusku wuxuu u isticmaali karaa hubka fudud maxbuus isagoo raacaya talaabooyinkan:-

b) Ka hor intaan la isticmaalin hubka si waafaqsan qodobkan, waxa la qaadayaa (marka ay qaadistooda duruufuhu oggolaanayaan) tallaabooyin lagu amrayo maxbuuska ama qofka kale in uu ka joogsado khaladka uu ku socdo,

t) Waxaa la adeegsanayaa hadii suurtagal tahey kooxa ciidanka ee ka hortaga kacdoonada maxaabiista.

j) Waxaa loo isticmaalayaa hadii uu ka joogsn waayo isku deyga in uu ka baxsado haynta sharciga ah, haddii ay ugu muuqato qofka hubka isticmaalaya in isticmaalka hubku uu lagama maarmaan u yahay ka joojinta maxbuuska baxsashada; ama

x) weeraraya ama isku deyaya in uu weeraro qof kale, haddii weerarkaasi uu ugu muuqdo

qofka hubka isticmaalaya in uu yahay dabeecad ahaan mid halis gelin kara nafta qofka kale.

(2) Taliye xabsi, sarkaal xabsi ama xubin ciidan ee oo uu Taliyaha Ciidanku u xilsaaray ilaalinta maxbuusku, wuxuu ku isticmaali karaa hubka fudud:

b) qof ka soo-furanaya ama isku deyaya in uu ka soo-furto maxbuus haynta sharciga ah ee Taliyaha Ciidanka; ama

t) qof u-dhacaya ama si kale ugu gelaya, isku deyaya in uu u-dhaco ama si kale ugu galo, u dhacay amaba si kale u galay xabsi isaga oo aan haysan oggolaansho sharci ah.

(3) Taliyaha Xabsigu wuxuu amri karaa in hub lagu isticmaalo tiro maxaabiis ah, marka ay si abaabulan u samaynayaan ama sameeyeen kacdoon ama dagaal ay kula wareegayaan ama ay kula wareegeen gacan-ku-haynta xabsiga ama qaybo muhiim ah oo ka mid ah, oo ay diidaan in ay u hoggaansamaan nidaamka iyo amarrada Taliyaha Xabsiga;

(4) Hubka fudud waxa loo isticmaali karaa xaaladaha ku xusan faqradaha (1, 2 iyo 3) ee qodobkan, marka ay Taliyaha Xabsiga ama qofka isticmaalaya hubka (markaanu Taliyaha Xabsigu joogin) ay ugu muuqato oo keliya in isticmaalka hubku uu lagama maarmaan u yahay xaqiijinta ujeeddada laga leeyahay faqradaha (1, 2 iyo 3) ee qodobkan.

(5) Haddii uu maxbuusku ama qofka kale ku hakan waayo tallaabada ku xusan faqradda (5) ee qodobkan, waxa bannaan in la isticmaalo hubka iyadoo aan marka hore wax-yeelladiisa lala beegsaneynin, haddii ay suurto-gal tahay, taas oo noqonaysa digniintii u dambeysey.

(6) Haddii maxbuusku ama qofka kale ku hakan waayo tallaabada ku xusan faqradda (6) ee qodobkan, lagana baqo in wixii intaas ka dambeeya ay dhacayso dhibaatadii laga hor-tegayey, waxa bannaan in hubka sida ugu suurto-galsan looga adeegsado meelo aan halis ahayn oo jidhkiisa ka mid ah sida in lugaha laga dhaawaco.

(7) Looma adeegsan karo hub maxbuuska ilaa qofka hubka isticmaalayaa xaqiiqsado in aan si kale loo baajin karin falka sharci-darrada ah ee maxbuusku ama qofka kale ku kacayo.

(8) Xaaladaha lagu sheegay faqradaha (1 iyo 2) ee qodobkan, sarkaalka xabsi ama xubinta ciidan ee loo xilsaaray ilaalinta maxbuusku ma adeegsanyo hub haddii uu goobta joogo Taliyaha Xabsigu, haddii aanu Taliyaha Xabsigu amar ku siinin sarkaalka xabsi ama xubinta ciidan ee loo xilsaaray ilaalinta maxbuuska in uu hubkiisa u adeegsado xaaladda;

(9) marka adeegsiga hubku uu sababo dil ama dhaawac culus, waxa Taliyaha Xabsigu si aan dib-u-dhac lahayn u baadhayaa sababta keentay dilka ama dhaawaca culus, gun-gaadhka baadhistana wuxuu si dhakhso ah ugu gudbinayaa Taliyaha Ciidanka iyo xafiiska Xeer-Ilaalinta.

(10) Sida ugu macquulsan ee suurto-galka ah, hubka la siiyo saraakiisha xabsigu waa in uu yahay hub uu leeyahay Ciidanku, oo uu isagu maamulo.

(11) Sarkaalka xabsi ama xubinta ciidan ee u adeegsada hubka qaabka sharciga ah, lana yimaadda taxadirka loo baahan yahay, loo raacimaayo masuuliyad madani ah oo falkiisa ka timaadda.

**Qodobka 43aad**

**Xoog-ku-Isticmaalista Xad-Gudubyada Ammaanka ee Waaweyn**

(1) Marka ay ugu muuqato Taliyaha Xabsiga in:

b) kala-dambayntii iyo ammaankii xabsiga uu ku yimi xad-gudub weyni, ama uu ku soo fool leeyahay; oo aan xabsiga laga heleyn hab kale oo gacan-ku-hayneed oo macquul ah oo wax lagaga qaban karaa;

(t) Taliyaha Xabsigu wuxuu amri karaa in xoog lagu isticmaalo maxbuus ama maxaabiis, iyadoo uu ka mid yahay xoog sababi kara dhimasho ama dhaawac halis ah.

(2) Inta aan la isticmaalin xoogga si waafaqsan faqradda (1) ee qodobkan, waxa la qaadayaa (marka ay duruufuhu oggolaanayaan in sidaa la yeelo) tallaabooyin lagu bixinayo amarrada lagama maarmaanka u ah in la soo-celiyo ama la sugo kala-dambaynta iyo ammaanka xabsiga gudihiisa iyo in la bixiyo digniino la xidhiidha cawaaqibka ka dhalan kara u-hoggaansan-la'aanta amarradaas.

**Qodobka 44aad**

**Dhimashada Maxbuuska**

(1) Marka ay dhimasho ku timaaddo maxbuus, Taliyaha Xabsigu wuxuu si degdeg ah u ogeysiinayaa:

b) dhakhtarka, si uu u caddeeyo sababta dhimashada;
t) xafiiska Xeer-Ilaalinta, si uu u baadho in dhimashada maxbuuska ay cidi dembi ku leedahay iyo in kale;
j) qoyska marxuumka si uu u xaqiiqsado xaaladda keentay dhimashada marxuumka;
x) maxkamadda awoodda u leh, haddii aanay dacwadda marxuumku ahayn mid noqotay kama dambays, si ay maxkamadda dacwaddu hor-taallaa ay u ooddo dacwadda dhimashada ku timi maxbuuska awgeed;
kh) taliska Guud ee Ciidanka.

(2) Haddii aan Xeer-ilaaliyaha Guud ama ku-xigeenkiisu sabab baadhiseed u joojin aaska maxbuuska dhintay, meydka maxbuuska waxaa lagu wareejinayaa qoyska maxbuuska dhintay.

3) Haddii aanu maxbuuska dhintay ehel lahayn ama aan la heli karin ehelkiisa, waxa meydka maxbuuska aasaya Ciidanka Asluubta, ka dib marka uu helo ruqsada Aasida ee Xafiiska Xeer-ilaalinta.

**Qodobka 45aad**

**Awoodda Baadhista iyo Su'aalo-Weydiinta Dadka Xabsiga Gelaya**

(1) Taliyaha Xabsigu wuxuu waajibin karaa ama amri karaa:

b) baadhista:

i. qof gelaya ama doonaya in uu galo xabsiga;
ii. qof debedda ka jooga xabsiga balse u dhaw, oo baadhistiisu ay Taliyaha Xabsiga ugu muuqato in ay lagama maarmaan u tahay kala-dambaynta iyo ammaanka xabsiga; iyo

t) hubinta shay kasta oo uu qofku haysto ama maamulayo oo uu ka mid yahay baabuurku.

(2) Qof loo oggolaaday in uu galo xabsi ama iyadoo loo oggolaaday in uu galo markaas uu ka baxay xabsiga, waxa Taliyaha Xabsigu amri karaa in baadhis lagu sameeyo isaga qof ahaan iyo ilmo kasta oo la socda waxaanu amri karaa, haddii ay la noqoto, hubinta shay kasta oo uu qofku haysto ama maamulkiisa ku sugan, ama uu ilmuhu haysto ama maamulka ilmaha ku sugan.

(3) Iyadoo aan meel lagaga dhacayn qodob kale oo Xeerkan ah, haddii qof diido in la baadho ama la hubiyo waxa uu haysto, waxa Taliyaha Xabsigu amrayaa:

b) In la baadho qofkaas;

t) in la hubiyo shay kasta oo uu qofkaasi haysto ama uu maamulkiisa leeyahay;

waxaanu Taliyaha Xabsigu diidi karaa in qofkaasi galo xabsiga, waxa kale oo uu amri karaa in qofkaas laga saaro xabsiga.

(4) Baadhista qofka dumarka ah ama ilmo, sida muuqata, da'diisu ka yar tahay 10 sano:

b) waxa si fiican u baadhaya sarkaal xabsi oo dumar ah ama qof kale oo dumar ah oo uu arrintaas u xilsaaray Taliyaha Xabsigu;

t) waxaana baadhista goob-joog u ahaanaya uun xubno dumar ah, marka se baadhistu ku wajahan tahay ilmo, waxa kale oo goob-joog u ahaanaya qofka la socda ilmaha, haddii aanu qofkaasi diidin goob-joognimada.

(5) Marka ay Taliyaha Xabsiga ugu muuqato in, shay uu haysto ama ku jira maamulka qof loo baadhay si waafaqsan qodobkani, uu wax u dhimi karo kala-dambaynta iyo ammaanka xabsiga waxa uu ka qaadi karaa shaygaas, waxaana, iyadoo la raacayo tilmaamaha Taliyaha Xabsiga, hadhow loo celinayaa qofka uu lahaanshiisu cad yahay amaba waxa loogu talinayaa sidii kale ee xeerkan ama xeer kale jideeyey.

(6) Taliyaha Xabsigu wuxuu waajibin karaa in qofka gelaya ama doonaya in uu galo xabsiga, ama iyadoo loo oggolaaday in uu galo, markaas uun ka baxay xabsigu:

b) uu qoraal ku muujiyo magaciisa oo buuxa iyo meesha laga helo, iyo magaca ilmaha la socda oo buuxa iyo meesha laga helo;

t) uu qoraal ku caddeeyo ujeeddada uu u gelayo ama uu u doonayo in uu u galo xabsiga;

waxaana qofka uu Taliyaha Xabsigu sidaa ku waajibiyey ee dhayalsada ama diida in uu u hoggaansamo waxa lagu waajibiyey, ama sheegta magac iyo hoy been ah, ama ujeeddada uu u gelayo ama uu u doonayo in uu u galo xabsiga been ka sheega, amaba si kale u bixiya war been ah ama marin-habaabin ah, wuxuu galay dembi, waxaana loo dhiibayaa ama looga war-bixinayaa Booliiska.

(7) Taliyaha Xabsigu wuxuu diidi karaa in uu u oggolaado qof in uu galo xabsiga, waxaanu amri karaa in laga saaro qof kasta oo:

b) diida ama dhayalsada in uu bixiyo xog laga doonayey in uu bixiyo si waafaqsan faqradda (6) ee qodobkan; ama
t) bixiya xog Taliyaha Xabsigu si macquul ah uga shakiyi karo in ay tahay been qayaxan.

(8) Taliyaha Xabsiga, sarkaal xabsi ama xubin ciidan oo loo xilsaaray in uu sameeyo baadhis ama hubin, wuxuu isticmaali karaa xoog inta macquul ahaan lagama maarmaan u ah ujeeddada.

**Qodobka 46[aad]**
**Dembiyada ka Dhasha Alaabta Reebban**

(1) Qof kasta oo soo gaadhsiiya, keena ama si kale u soo geliya xabsiga alaab reebban ama isku daya in uu soo gaadhsiiyo, keeno ama si kale u soo geliyo xabsiga alaab reebban:
b) isagoo uga dan leh in uu jebiyo kala-dambaynta, ammaanka iyo maamul wanaagga xabsiga; ama
t) marka alaabta reebbani tahay mid wax u dhimi karta kala-dambaynta, ammaanka iyo maamul wanaagga xabsiga;

wuxuu galay dembi waxaana loo dhiibayaa ama looga war-bixinayaa booliiska.

(2) Qofka, isagoo aan oggolaansho ka haysan Taliyaha Xabsiga ama Taliyaha Ciidanka, kala baxa, ka qaada ama si uun uga saara xabsiga alaab reebban oo aanu haysan markii loo oggolaaday in uu galo xabsiga, wuxuu galay dembi waxaana loo dhiibayaa ama looga warbixinayaa booliiska.

(3) Qofka, si uu u helo oggolaansho uu ku soo gaadhsiiyo, ku keeno ama kaga saaro xabsiga alaab reebban, si u-kas ah u dhiiba weedh ama xog been ah, ama cid kale iska dhiga, wuxuu galay dembi waxaana loo dhiibayaa ama looga warbixinayaa booliiska.

(4) Sarkaalka xabsi ama xubinta ciidan ee oggolaada in alaab reebban loola dhaqmo sida lagu mamnuucay faqradaha (1) iyo (2) ee qodobkan wuxuu galay dembi waxaana loo dhiibayaa ama looga war-bixinayaa Taliyaha Xabsiga.

(5) Sarkaal booliis ama sarkaal xabsi, isaga oo aan u soo goyn xadhig-jideeye, wuxuu xidhi karaa qofka uu ku qabto isaga oo ku xad-gudbaya ama si macquul ah ugu muuqda in uu ku xadgudbayo faqradaha (1), (2) iyo (4) ee qodobkan.

(6) Sarkaalka xabsi ee qof xidha, isagoo raacaya faqradda (5) ee qodobkan, wuxuu qofkaa ku wareejinayaa sarkaal booliis, si uu sarkaalkaa booliis qofkaa sharciga u mariyo.

(7) Marka dhegeysiga dacwadda qof lagaga caddeeyo, iyadoo la raacayo faqradaha (1) ilaa (4) ee qodobkan, in uu soo geliyey ama ka saaray xabsiga ama uu isku dayey in uu soo geliyo ama ka saaro xabsiga alaab reebban, waxa difaac u noqon kara qofkaa in uu caddeeyo in alaabtaa reebban soo-gelinteeda ama ka saaristeeda xabsiga uu oggolaansho uga haystey Taliyaha Xabsiga.

(8) Sarkaalka xabsi ama xubinta ciidan ee lagu helo dembi, si waafqsan faqradda (7) ee qodobkan, wuxuu waayayaa shaqadiisa.

## Qodobka 47aad
## Reebbanaanta Ag-Joogista Xabsiga iyo Maxaabiista

(1) Waxa reebban in cid, aan shaqo la garanayo ka hayn ama muraadka ay u joogaan aan la aqooni, ay ag joogto xabsiga ama goob kale oo ay maxaabiisi ku sugan tahay, qof kasta oo uu sarkaal booliis ama sarkaal xabsi uu uga digo arrintaas ama uu ka codsado in uu halkaa ka tago oo u hoggaansami waayana waxa loo qaadanayaa in uu ujeeddo qalloocan leeyahay.

(2) Sarkaal booliis ama sarkaal xabsi, isaga oo aan u soo qaadan xadhig-jideeye, wuxuu xidhi karaa qof kasta oo uu ku qabto isagoo ku xadgudbaya ama uu si macquul ah ugu arko in uu ku xadgudbayo faqradda (1) ee qodobkan.

(3) Sarkaalka xabsi ee qof xidha, isagoo raacaya faqradda (2) ee qodobkan, wuxuu qofkaa ku wareejinayaa sarkaal booliis, si uu sarkaalkaa booliis qofkaa sharciga u mariyo.

## Qodobka 48aad
## Dembiyada Xabsiga

(1) **Dembiyada fudud ee xabsiga:**

Maxbuuska:

b) u hoggaansami waaya qodob xeer ama amar joogto ah oo xabsiga khuseeya ama amar sharci ah oo uu bixiyey sarkaal xabsi ama xubin ciidan oo awood ku lihi;
t) ku shaqeeya caajisnimo, dhayalsi ama taxadir-darro;
j) u dhaqma si qaab-daran;
x) adeegsada luuqad aan hufneyn (cay, aflagaaddo ama hanjabaad) ama u dhaqma si aan ixtiraam lahayn ama hanjabaad ah oo lid ku ah sarkaal xabsi ama xubin ciidan;
kh) iska yeel-yeela bukaan ama dhaawac;
d) si u-kas ah ama cadawnimo ah u wax-yeelleeya ama u burburiya hanti;
r) door-bida in uu ka sheegto saraakiisha cabasho been ah ama caadeysta in uu kaga cawdo wax aan cabasho gelin; ama
s) ka baaqsada waajib ama ku kaca fal hoggaan-diidmo ah ama wax u dhimi kara kala-dambaynta iyo maamul-wanaagga xabsiga wuxuu galay dembi fufud oo xabsi, waxaana laga qaadayaa talaabo anshax-marineed

(2) **Dembiyada culus ee xabsiga**

Maxbuuska:

b) u dhaqma qaab gadoodis ah,
t) weerara qof,
j) ka baxsada, diyaariya ama isku daya ka-baxsasho hayn sharci ah, ama qolka ama meesha kale ee xabsiga ah ee nidaamka xabsiga ama amar ku waajibiyey in uu ku sugnaado,
x) isticmaala ama haysta dawo aan sifo sharci ah lagu siin,
kh) u isticmaala dawo qaab aan ahayn kii loogu qoray,

d) isticmaala ama haysta isbiirto,
r) isticmaala, ama oggolaansho la'aan haysta, xabag ay ku jirto toluene ama maaddo kale oo sun ahi,
s) ka-been sheega arrin si rasmi ah wax looga weydiiyey,
Sh) haysta hub ama wax hub u eg,

wuxuu galay dembi culus oo xabsi.

(3) **Eedaymaha dembiyada xabsiga**

Eedaynta dembi xabsi in uu galay maxbuus waxa samayn kara sarkaal xabsi ama xubin ciidan, waxaana si dhakhso ah loogu soo gudbinayaa Taliyaha Xabsiga, oo ka dib marku tixgeliyo nuxurka dembiga xabsi ee maxbuuska lagu soo dacweeyey iyo duruufaha jira:

b) kula heshiin kara maxbuuska in uu ka hakiyo tallaabadii uu ka qaadi lahaa maxbuuska dembigaa dartii muddo aan ka badnayn 3 bilood, oo uu amri doono in lagala noqdo eedda muddadaa dhammaadkeeda, haddii uu la yimaaddo hab-dhaqan toosan;
t) amri kara in markaaba eedaynta lagala noqdo, ama eedayn dheeraad ah ama ka duwan loo soo sameeyo;
j) baadhis ku samayn kara dembiga xabsi, go'aamin karana in eedayntu noqoto gelitaan dembi xabsi oo fudud, si waafaqsan Qodobka 50aad;
x) marinaya maxbuuska nidaamka eedaynta dembiyada xabsi ee culus iyo dembiyada Xeerka Ciqaabta Guud, haddii aanu maxbuusku dooran in uu dacwadda dhegeysto Taliyaha Xabsigu, Taliyaha Xabsiguna u arkin in ay sidaa ku jirto danta cadaaladdu, iyadoo markaa ka dib uu Taliyaha Xabsigu ku tallaabsanayo in uu dacwadda u raaco Qodobka 50aad ee Xeerkan.

waxaanu markaaba qaadayaa tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee uu ku sugayo maamul-wanaagga, kala-dambaynta iyo ammaanka xabsiga oo ay ka mid noqon karaan gaar-u-xidhidda maxbuuska si waafaqsan qodobka 41aad ee Xeerkan, ama u-wareejintiisa xabsi ka ammaan sarreeya.

## Qodobka 49aad
## Habka Dhegeysiga Dacwadaha Dembiyada Xabsi ee Fudud

(1) Dacwad kasta oo la xidhiidha dembi xabsi waxa la dhegeysanayaa iyadoo uu goob-joog yahay maxbuuska lagu eedeeyey, waxaana lagu dhegeysanayaa xabsiga uu falku ka dhacay ama meel kale oo ku habboon.

(2) Marka maxbuuska lagu eedeeyo in uu galay dembi xabsi oo fudud, ee uu qiran waayo eedaynta, Taliyaha Xabsiga ayaa eedaynta uga go'aan gaadhaya, sida kiisku yahay, isagoo raacaya habka lagu jideeyey xeer-nidaamiyaha.

(3) Taliyaha Xabsigu kuma khasbana in uu raaco qodobbada xeerka caddaynta, waxa se uu oggolaan karaa caddayn kasta oo ugu muuqata in ay khusayso eedaynta, waxaanu diidi karaa caddaynta ku-cel-celinta ah.

**Qodobka 50aad**
**Ku-Xukumidda Ciqaabta ee Taliyaha Xabsiga**

(1) Marka Taliyaha Xabsigu go’aamiyo in uu dhacay dembi xabsi oo fududi, taas oo ku timi maxbuuska oo qirtay ama iyadoo lagu caddeeyey, Taliyaha Xabsigu wuxuu ku xukumi karaa mid ama ka badan oo ka mid ah ciqaabaha hoos ku qoran:

- b) digniin,
- t) canaan,
- j) gaar-ugu-xidhid guryaha hurdada ee maxaabiista muddo aan ka badnayn 7 cisho;
- x) gaar-ugu-xidhid qolka ciqaabta muddo aan ka badnayn 7 cisho;
- kh) waayidda xabsi-dhimistii bishaa oo beddel u noqonaysa ama dheeraad ka noqonaysa tallaabooyinka 1(j) ama 1(x).
- d) Ka-qaadista xabsi-dhimista 7-28 cisho, iyadoo loo eegayo culayska dembiga xabsi ee maxbuusku galay markiiba.

(2) Marka ay tahay in ciqaab laga xukumo isku xilli dembiyo xabsi oo fudud oo mid ka badan, Taliyaha Xabsigu wuxuu ka xukumi karaa ciqaabta ku xusan 1(j) ama 1(x) ee qodobkan dembi kasta, isugeynta ciqaabtu se sinaba ugama badan karto gaar-u-xidhid 21 cisho ah.

**Qodobka 51aad**
**U-Gudbinta Taliyaha Ciidanka Dembiyada Xabsiga**

(1) Taliyaha Xabsigu wuxuu u gudbin karaa Taliyaha Ciidanka mar kasta oo uu u arko in dembiga xabsi yahay mid aad u culus oo maxbuuska loogu gudbin karo maxkamad.

(2) Marka si waafaqsan faqradda (1) ee qodobkan Taliyaha Ciidanka loogu soo gudbiyo dembi xabsi oo maxbuus lagu eedaynayo, Taliyaha Ciidanka waxa u bannaan:

- b) inuu amro in la baadho lana sugo dembiga dhacay, goorta uu dhacay, sida uu dhacay iyo caddaymaha loo hayo maxbuuska ku eedaysan; iyo
- t) in uu ku xukumo maxbuuska ciqaab anshax-marineed; ama
- j) in uu dacwadda u gudbiyo Xeer-Ilaalnta si maxbuuska loo horgeeyo maxkamadda awoodda u leh.

(3) Xaaladaha ay Talliyaha ugu muuqato in uu ciqaab ku xukumo maxbuuska, wuxuu ku anshax-marin karaa hal ama ka badan ganaaxyada hoos ku qoran:

- b) in laga jaro khasaaraha uu geystay, haddii ay jirto lacag maxbuuska u taalla xabsiga.
- t) in laga jaro danaha dheeraadka ah ee ku leeyaha xabsiga (privileges);
- j) in gaar loo xidho muddo aan ka badnayn 30 cisho iyada oo aan mudadaas loo tirin xabsi-dhimis;
- x) in lagala noqdo xabsi-dhimista muddo aan ka badnayn 90 cisho

**Qodobka 52aad**

**U-Gudbinta Maxbuuska Maxkamad**

(1) Taliyaha Xabsigu, ka dib markuu helo oggolaanshaha Taliyaha Ciidanka, wuxuu amari karaa in maxbuuska dembiga culus ku galay xabsiga loo gudbiyo xeer-ilaalinta si uu maxkamadda awoodda u leh kaga hor-oogo dembiga culus ee uu galay.

(2) Haddii maxbuuska uu ku caddaado dembiga lagu eedeeyey, waxa lagu xukumayaa ilaa lix bilood, haddii aanu dembigu ahayn mid aad u culus.

(3) Haddii ay xeer-ilaalinta ugu muuqato in dembiga maxbuusku ku galay xabsigu yahay mid culus, waxa ay maxkamadayntiisa u raaci kartaa Xeerka Ciqaabta Guud.

(4) Maxbuusna laguma ciqaabi karo dembi hore loogu anshax-mariyey.

**Qodobka 53aad**

**Diiwaanka Anshax-Marinta**

(1) Markuu ciqaab ansha-marineed ka xukumo dembi xabsi, Taliyaha Xabsigu wuxuu ku qorayaa diiwaanka Anshax-marinta magaca qofka la anshax-mariyey, weedh muujinaysa nooca dembiga ee ciqaabta lagaga xukumay, taariikhda dembigu dhacay iyo tallaabada anshax-marineed ee lagaga xukumay; waanu saxeexayaa isagoo taariikhda diiwaan-gelinta dembigana ku muujinaya diiwaanka.

(2) Taliyaha Xabsigu wuxuu si bil-le ah ugu gudbinayaa Hogaanka Xabsiga faah-faahinta anshax-marin kasta oo lagu qoray diiwaanka anshax-mari.

## QAYBTA 6^AAD
## BOOQASHOOYINKA RASMIGA AH

### Qodobka 54^aad
### Xaqa Gelitaanka

1) Xabsiga waxa soo booqan kara, kormeerina kara: Maxkamadaha, Xeer-ilaalinta, Guddiyadda Baarlamanka ee Hawshaasi qaabilsan, Guddi Xukuumadu u ig-mato arrin gaar ah, Wasaaradda Caddaaladda Qaybta Xabsiyada & Komishanka Xuquuqul-in-saanka iyaga oo u hawl geli kara si gaar-gaar ah & wada jirba; kormeerayana dhammaan xaaladaha kala duwan ee Xabsiyada, iyaga oo sii maraya Taliyaha Ciidanka Asluubta si ugu fududeeyo hawl-gudashadooda.

2) Soo-Booqdeyaasha Rasmiga ahi waxay eegi karaan xaaladda xabsi kasta iyo maxbuus kasta oo ku xidhan halkaa, waxay su'aalo weydiin karaan sargaal xabsi oo kasta, saraakiisha kale ama maxbuus kasta, waxaanay aragtidooda la xidhiidha xaaladda xabsiga iyo maxaabiista ku qorayaan Buugga Soo-Booqdeyaasha.

3) Kormeerayaasha Rasmiga ah /Soo-Booqdayaasha waxay eegi karaan xaaladda xabsi kasta iyo maxbuus kasta oo ku xidhan halkaa, waxay su'aalo weydiin karaan sargaal xabsi oo kasta, saraakiisha kale ama maxbuus kasta, waxaanay aragtidooda la xidhiidha xaaladda xabsiga iyo maxaabiista ku qorayaan Buugga Soo-Booqdeyaasha/Kormeerayaasha.

4) Taliyaha Xabsigu wuxuu aragtida Kormeerayaasha Soo-Booqdayaasha, ee lagu qoray Buugga Kormeerayaasha iyo tallaabada uu ka qaaday, haddii ay jirto ama uu soo jeedinayo in laga qaado, raacinayaa warbixintiisa bil-laha ah ee uu u qorayo Hogaanka Xabsig.

### Qodobka 55^aad
### Gacan-siinta Booqdeyaasha Rasmiga ah iyo Guddida Kormeerka Xabsiyada

1) Sarkaal xabsi oo kasta iyo xubin ciidan oo kastaaba waa inuu si dhammaystiran u-gacan-siiyo, iskaashi buuxana la yeesho Guddi kasta oo kormeer, oo xabsiga u soo booqda si waafaqsan qodobbada 54^aad ee Xeerkan.

2) Sarkaal xabsi, xubin ciidan ama maxbuusna:-
    b) waa in aanu, sabab macquul ah la'aanteed, is-hortaagin, u-diidin ama haddidin Guddiyadda Kormeerka Xabsiyada ee lagu sheegay Qoddobka 54aad ee Xeerkan, ama qof la shaqaynaya, oo u gudanaya mas'uuliyaddiisa si waafaqsan Xeerkan;
    t) Waa in aanu siin xubin ka tirsan Guddida Kormeerka Xabsiyada, ama qof la shaqaynaya oo u gudanaya mas'uuliyaddiisa si waafaqsan Xeerkan, weedh uu ogyahay in ay tahay been ama marin-habaabin.

3) Sarkaalka xabsi, xubinta ciidan ama maxbuuska, sabab macquul ah la'aanteed, is-hortaaga ama

haddida xubin ka tirsan Komishanka Xuquuqda Aadamaha Somaliland, Guddida Kormeerka Xabsiyada, ama qof la shaqaynaya Guddida oo u gudanaya mas'uuliyaddiisa si waafaqsan Xeerkan, waxa uu galay dembi, waxaana loo ciqaabayaa si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Guud.

4) Gudiyada Golayaasha baarlamaanku wxay xaq u leeyihiin inay kormeeraan xabsiyada iyo jeelasha iyadoo wixii dhalliilo ah qoraal ahaan ugu gudbinaya Golayaasha ay ka tirsanyihiin ee Baarlamaanka.

## Qodobka 56aad
## Kormeerka Taliyaha Xabsiga

(1) Maalin kasta oo uu xabsiga joogo, Taliyaha Xabsigu wuxuu booqanayaa qayb kasta oo xabsiga ah oo maxaabiisi ku xidhan tahay, waxaanu eegayaa xaaladda maxaabiista, qaybaha iyo qolalka xabsiga.

(2) Si joogto ah, laakiin aan muddo go'an lahayn, Taliyaha Xabsigu wuxuu booqanayaa xabsiga saacadaha habeennimada si uu u hubiyo xil-gudashada saraakiisha xabsi iyo ammaanka xabsiga.

(3) Booqashooyinka saacadaha shaqada caadiga ka baxsan waxa la gelinayaa Buugga Dhacdooyinka ee Xabsiga (prison occurrence book).

## QAYBTA 7AAD
## BOOQASHADA MAXAABIISTA IYO LA-XIDHIIDHKA MAXAABIISTA

### Qodobka 57aad
### Booqashada Ehelka iyo Asxaabta Maxaabiista

(1) Maxbuuska waxa loo oggolaanayaa in ay booqasho ugu yimaaddaan ehelkiisa iyo saaxiibbadii si waafaqsan xeer-nidaamiyaha.

(2) Maxbuus kasta waxa loo oggolaanayaa, wakhti macquul ah gudihii, in uu booqasho ka helo:
- b) xubnaha qoyskiisa iyo saaxiibbadii;
- t) qof mihnadda caafimaadka ku shaqeeya;
- j) qof mihnadda sharciga ku shaqeeya;
- x) wakiil aqoon u leh diintiisa;
- Kh) marka maxbuusku yahay muwaadin dal shisheeye, wakiil ka socda safaaraddiisa,
- d) Xubnaha Guddida Kormeerka Xabsiyada.

(3) Sarkaal xabsi kastaa wuxuu baadhis marin karaa soo-booqdaha intaanu xabsiga gelin, waxa se maxbuuska baadhi karaa sarkaal xabsi oo la jinsi ah soo-booqdaha.

(4) Baadhista waxa ku jiri kara eegista iyo hubinta shay kasta oo uu soo-booqduhu xabsiga gelinayo ama ka saarayo, iyo baabuur kasta oo gelaya ama ka baxaya xabsiga.

(5) Taliyaha Xabsigu wuxuu u diidi karaa in uu galo xabsiga qof kasta oo diida in la baadho.

(6) Xaaladaha gaarka ah ee maxbuus garsuge ahi ku eedaysan yahay dembi culus, maxkamadda awoodda u leh waxa u bannaan, ka dib markay hesho codsiga xeer-ilaalinta, in ay ku wargeliso Taliyaha Xabsiga in maxbuuskaa lagu soo booqan karo oggolaanshaha maxkamadda oo keliya.

### Qodobka 58aad
### Booqashada Qareenka

Ujeeddo la xidhiidha dacwad Maxkamad ku jirta darteed, qareenku wuxuu, meel u muuqata sarkaal xabsi laakiin aanu ka maqleyn wada-hadalkooda, ku waraysan karaa maxbuuska uu qareenka u yahay ama u noqonayo, xilli macquul ah ama goorta uu u oggolaado Taliyaha Xabsigu.

### Qodobka 59aad
### Booqashada Dhakhtarka

Ujeeddo la xidhiidh caafimaadka maxbuuska, Taliyaha Xabsigu wuxuu oggolaanayaa in dhakhtarka gaarka ah ee maxbuuska ama dhakhtar kale oo takhasus u leh xanuunka maxbuusku uu waqti macquul ah ama waqtiga kale ee uu Taliyaha Xabsigu u arko lagama maarmaan, uu booqdo maxbuuska.

**Qodobka 60aad**
**Booqashada Booliiska**

Sarkaal Booliiska ahi saacadaha shaqada, ka dib marka ay oggolaato maxkamadda awoodda u leh, wuxuu geli karaa xabsiga, waxaanu meel u muuqata sarkaal xabsi laakiin aanu ka maqleyn wada-hadalkooda, kula yeelan karaa maxbuuska loo oggolaaday waraysi rasmi ah oo leh ujeeddo baadhitaan.

**Qodobka 61aad**
**Soo-Booqdeyaasha Kale ee Maxaabiista**

(1) Qofka aan ahayn qofka loogu soo oggolaaday in uu booqdo ama waraysto maxbuus si waafaqsan qodobbada 58aad, 59aad, 60aad iyo 61aad ee doonaya in uu booqdo maxbuus ujeeddo xalaal ah, waxa u oggolaan kara Taliyaha Ciidanka.

(2) Oggolaanshaha booqashada maxbuuska si qaafaqsan faqradda (1) ee qodobkan, waxa lagu bixin karaa shuruudaha ay Taliyaha Ciidanka ugu muuqato in ay ku habboon yihiin.

**Qodobka 62aad**
**Soo-Booqdaha Gelitaanka loo Diidi Karo ama Xabsiga laga Saari Karo**

(1) Haddii Taliyaha Xabsiga ay la noqoto in soo-booqde ama qof kale uu wax u dhimayo ilaalinta kala-dambaynta iyo ammaanka xabsiga, wuxuu, isagoo aan tixgelin qodob kale oo Xeerkan ama xeer kale ah, u diidi karaa in uu galo xabsiga, haddii qofkaa loo oggolaaday in uu galana, uu ka saari karaa ama amri karaa in laga saaro xabsiga, waxaanu u isticmaali karaa xoogga macquulka ah ee lagama maarmaanka u ah ujeeddadaas.

(2) Taliyaha Xabsigu wuxuu ku ogeysiinayaa Hogaanka Xabsiyada warbixintiisa bil-laha ah tallaabo kasta oo uu u qaaday si waafaqsan faqradda (1) ee qodobkan.

(3) Isagoo aan tixgelin qodob kale oo Xeerkan ah, Taliyaha Ciidanku wuxuu ka mamnuuci karaa qof inuu booqdo xabsi cayiman ama xabsiyo cayiman guud ahaan muddo cayiman.

(4) Taliyaha Ciidanku wuxuu la noqon karaa mamnuucid uu qof kaga soo rogey booqasho xabsi.

(5) Muddada ugu badan ee qof laga mamnuuci karo booqasho xabsi waxa lagu qeexayaa xeer-nidaamiyaha, muddooyin kala duwan baana loo jideyn karaa xaalado cayiman oo kala duwan.

**Qodobka 63aad**
**Xidhiidhka Maxaabiista iyo Bulshada**

(1) Ahmiyad gaar ah ayuu Taliyaha Xabsigu siinaya dhawrista xidhiidhka u dhexeeya maxaabiista iyo qoysaskooda iyo bulshada.

(2) Maxbuusku wuxuu xaq u leeyahay xidhiidh is-gaadhsiineed oo qoraal ah. Marka laga reebo xidhiidhka sharci ee maxbuuska iyo wakiilkiisa sharci oo loo aqoonsanayo mid la dhawray oo

qarsoodi ah, dhammaan xidhiidhada qoraalka ah ee ku socda ama ka socda xabsiga waxa la marinayaa baadhis, waxaana lagu fasaxayaa oggolaansha Taliyaha Xabsiga.

**Qodobka 64aad**
**Helitaanka Adeeg Sharci**

(1) Maxbuus kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu arrin kasta oo sharci kala tashado qof ku shaqeeya mihnadda sharciga oo uu isagu doortay, saacad macquul ah ama goorta kale ee uu Taliyaha Xabsigu u oggolaado.

(2) Booqashooyinka adeegga sharciga waxa lagu qabanayaa goob u muuqata sarkaal xabsi laakiin aanu ka maqlayn, si loo ilaaliyo qarsoodinimada sharciga ah ee is-waraysiga maxbuuska iyo qareenkiisa.

(3) Xeer-nidaamiyaha ayaa qeexi doona qaabka loo suurto-gelinayo helitaanka adeegga sharci iyadoo ay ku jiri doonaan xaddidaadaha lagama maarmaanka u ah xabsi-ku-haynta sugan ee maxbuuska.

**Qodobka 65aad**
**Beddelka Maxaabiista**

(1) Maxbuuska garsugaha ah looma beddeli karo xabsi ka fog maxkamadda dacwaddiisa awoodda u leh, haddii aanay maxkamad awood u lihi amrin in xabsi kale loo wareejiyo.

(2) Maxbuuska xukuman ee racfaan qaatay ama laga qaatay waxaa lagu haynayaa ama loo beddelayaa xabsiga ugu dhow maxkamadda dacwaddiisu hortaallo.

(3) Xaalad kasta oo maxbuuska laga beddelayo xabsiga uu ku xidhan yahay, waxa beddelkiisa la ogeysiinayaa qoyskiisa, ehelkiisa, qareenkiisa ama ciddii kale ee uu doorto ka hor beddelkiisa;

(4) Marka ogeysiinta lagu sheegay faqradda (3) ee Qodobkan, aan loo samayn karin sabab ammaanka la xidhiidha ama fulinta beddelka oo degdeg ahaa, waxa la samaynayaa isla marka maxbuuska la geeyo xabsiga loo beddelayo;

(5) Markuu beddelku xaaladda caafimaad ama nololeed ee maxbuuska uu ku keenayo dhibaato, Taliyaha Ciidanku wuxuu siinayaa tixgelin gaar ah.

## QAYBTA 8AAD
## DARYEELKA MAXAABIISTA

**Qodobka 66aad**
**Cuntada Maxaabiista**

(1) Maxbuuska waxa la siinayaa cunto ku filan, si wafaqsan shaxda lagu qeexay xeer-nidaamiyaha.

(2) Maxbuuska waxaa loo oggolaan karaa in uu cunto ka helo cid gaar ah saacado habboon, iyada oo la marin doono baadhis, laguna hubin doono shuruudaha kale ee uu u dhigo Taliyaha Xabsigu.

(3) Duruufaha gaarka ah ee uu maxbuusku ku sugan yahay awgeed ama iyadoo loo tixgelinayo heerkiisa nolosha, waxa la siin karaa nooca cuntada ee uu maxbuusku caadeystey.

**Qodobka 67aad**
**Dharka Maxaabiista**

(1) Maxbuus kasta oo xukumane ah waxa la siinayaa dharka xabsiga oo lagu qeexay xeer – nidaamiyaha.

(2) Maxbuuska waxa dharka caadiga ah loogu oggolaan karaa qoraal dhakhtar oo sababaysan ama amarka Taliyaha Xabsiga isagoo tixgelinaya duruuf jirta oo u gaar ah maxbuuska.

(3) Maxbuuska garsugaha ahi wuxuu xaq u leeyahay in uu isticmaalo dharkiisa caadiga ah, haddii uu nadiif yahay kuna habboon yahay.

(4) Marka uu maxbuus garsuge ahi aanu haysan dhar ama uu Taliyaha Xabsigu u arko in dharka maxbuusku yahay mid aan laga raalli noqon karin, waxa la siinayaa dharka xabsiga .

(5) Haddii maxbuuska uu ka madho dharku ama ay suurto-gal tahay in uu cudur ka qaado, Taliyaha Xabsigu wuxuu amrayaa in la baabiiyo dharkaas, iyadoo markay sidaasi dhacdo, maxbuusku markuu xabsiga ka baxayo dhar u qalma looga iibinayo khasnadda dawladda, haddii aanu ka heli karin ehelkiisa ama hay'adaha samo-falka.

**Qodobka 68aad**
**Jiifka Maxaabiista**

(1) Maxbuuska waxa jiif laga siinayaa dhisme:

- b) uu ka helayo meel jiif ugu filan, laydh iyo hawo-mareen wanaagsan iyo wixii kale ee lagama maarmaan u ah caafimaadka jidh ahaaneed iyo maskax ahaaneed ee maxbuuska;
- t) u habaysan qaab dhaqan ahaan ku habboon;
- j) waafaqsan shuruudaha ku xusan xeer-nidaamiyaha.

(2) Marka hoolal loo isticmaalayo jiifka, waxa si taxadir leh guri walba la isugu soo xulayaa maxaabiista duruufahaas si habboon ugu wada dhaqmi kara, waxaana lagu samaynayaa kormeer

joogto ah oo habeennimo.

(3) Maxbuus kasta , waa in uu helaa gogol, sida lagu faah-faahin doono xeer-nidaamiyaha.

(4) Gogol gaar ah waxa lagu bixin kara talo-bixinta dhakhtarka.

**Qodobka 69aad**
**Xafidaadda Lacagta, Dharka iyo Alaabta Kale ee Maxbuuska**

(1) Lacagta, dharka iyo alaabta kale ee maxbuuska, ee aan loo oggolayn in uu maxbuusku haysto inta uu xidhan yahay, waa loo xafidayaa iyada oo loo raacayo tallaabooyinka ku xusan faqraddaha (6, 7 iyo 8) ee Qodobka 20aad ee Xeerkan.

(2) Lacagta, dharka iyo alaabta loo xafidayo maxbuuska, waxa lagu wareejinaa maxbuuska leh marka maxbuuska laga sii daayo xabsiga.

(3) Haddii maxbuusku weydiisto Taliyaha Xabsiga in lacagta ama alaabta uu leeyahay maxbuusku lagu wareejiyo maxbuuska ehelkiisa ama saaxiibadii, Taliyaha Xabsigu wuu ku wareejinayaa, waxaana laga saxeexayaa maxbuuska iyo cidda uu u dhiibanayo alaabta saxeex suul-saar ah; dharka la wareejinayo waxa Taliyaha Ciidanku uga reebayaa maxbuuska hal bedled oo maxbuuska la siiyo marka uu xabsiga ka baxayo.

**Qodobka 70aad**
**Codsiyada iyo Cabashada Maxbuuska**

(1) Maxbuusku wuxuu xaq u leeyahay in uu codsi ama cabasho u qorto Taliyaha Xabsiga, Taliyaha Ciidanka ama Wasiirka, haddii meel lagaga dhacay xuquuqdiisa aasaasiga ah ama xuquuqdiisa isagoo ah qof xorriyadda laga qaaday.

(2) Maxbuusku wuxuu codsigiisa ama cabashadiisa ku hagaajinayaa Taliyaha Xabsiga, Taliyaha Xabsiguna:

- b) wuxuu diiwaan-gelinayaa codsiga ama cabashada iyo tallaabo kasta oo la qaaday si wax looga qabto;
- t) wuxuu si deg-deg ah wax uga qabanayaa codsiga ama cabashada, maxbuuskana la socodsiinayaa natiijada;
- j) haddii cabashadu ku saabsan tahay eedayn la xidhiidha weerar, wuxuu hubinayaa in maxbuuska si deg-deg ah loogu diro baadhis caafimaad, in uu helo daweyn habboon iyo in cabashada loo gudbiyo Xeer-Ilaaliyaha Guud.

(3) Haddii uu maxbuusku ku qanci waayo jawaabta Taliyaha Xabsiga ee la xidhiidha codsigiisa ama cabashadiisa, wuxuu tabashadiisa u gudbinayaa Taliyaha Ciidanka, isagoo sii marinaya Taliyaha Xabsiga;

(4) Haddii uu maxbuusku ku qanci waayo jawaabta Taliyaha Ciidanka ee la xidhiidha codsigiisa ama cabashadiisa, wuxuu tabashadiisa u gudbinayaa Guddida Kormeerka Xabsiyada ama Wasiirka, isagoo sii marinaya Taliyaha Xabsiga;

(5) Taliyaha Xabsiga waxa ku waajib ah in codsiga ama cabashada uu maxbuusku u qorto Taliyaha Ciidanka uu si deg-deg ah ugu gudbiyo Taliyaha Ciidanka, isagoo raacinaya tallaabooyinka uu ka qaaday codsiga ama cabashada maxbuuska; Taliyaha Ciidankana waxa ku waajib ah in uu codsiga ama cabashada maxbuusku u qorto Wasiirka uu si deg-deg ah ugu gudbiyo isagoo raacinaya tallaabooyinka uu ka qaaday codsiga ama cabashada maxbuuska.

## QAYBTA 9AAD
## WAXBARASHADA, DHAQAN-CELINTA IYO SHAQADA MAXAABIISTA

### Qodobka 71aad
### Waxbarashada Maxbuuska

(1) Taliyaha Xabsigu wuxuu qaadayaa tallaabo kasta oo suurto-gal ah oo uu maxaabiista ugu diyaarinayo fasallo waxbarasho, isla markaana ugu oggolaanayo wakhti habboon oo ay ku bartaan farsamo-gacmeed (handicrafts), xirfado iyo nooc kasta oo waxbarsho oo ay u baahan yihiin, iyadoo fiiro gaar ah la siinayo xirfad-barista maxaabiista aan lahayn farsamo ay ku shaqaystaan markay xabsiga ka baxaan.

(2) Wasiirku wuxuu u magacaabi karaa xabsiyada culimo  arrimaha diinta ku wacdiya maxaabiista, waxaana la siin karaa mushahar ama abaal-marin lagu faahfaahinayo xeer-nidaamiyaha.

(3) Taliyaha Xabsiga waxaa waajib ka saaran yahay in maxbuus kasta oo xukuman oo aan wax qorin, waxna akhriyin in uu barto akhris-qorista iyo tirada afka Soomaaliga iyo afafka kale mar kasta oo ay suuragal tahay

(4) Taliyaha Xabsigu wuxuu suuragelinayaa oo fududaynayaa fursad kasta oo maxaabiistu dhexdooda ay wax isku bari karaan.

(5) Taliyaha Xabsigu wuxuu, mar kasta oo ay habboonaato, si guud iyo si gaar-gaar ahba waano iyo wacdi u siinayaa maxaabiista.

(6) Meel kasta oo ay ka suurto-geleyso, waxa laga hir-gelinayaa adeegyada tababarka jidhka iyo kaabeyaasha dhaqan-celinta, oo loo samaynayo gaar ahaan maxaabiista da'da yar iyo maxaabiista xadhig muddo dheer ah ku xukuman.

(7) Marka uu ka suurto-gelayo, waxa xabsiga laga hir-gelinayaa maktabad ay maxaabiistu ka ammaaneysan karaan buugaagta iyo kutubta si waafaqsan hadba nidaamka uu u dhigo Taliyaha Ciidanku.

### Qodobka 72aad
### Barnaamijyada Dhaqan-Celinta

(1) Taliyaha Xabsigu, mar kasta oo ay suuragal tahay, wuxuu diyaarinayaa barnaamijyo dhaqan-celineed, isagoo la kaashanaya dad aqoon u leh oo ku habboon noocyada kala duwan ee maxaabiista.

(2) Barnaamijyadaa dhaqan-celimeed waxay ku wajahnaanayaan, sidii maxbuuska looga suulin lahaa dhaqanka dembiilenimo, looguna beeri lahaa dhaqan toosan oo uu bulshada dib ugula midoobo marka la sii-daayo.

(3) Maxbuuska xaaladaha nafsiga ee duruufaha gaarka ah leh ku sugan, waxaa la siinayaa dhaqan-celin iyo daweyn nafsi ah oo xaaladdiisa ku habboon.

## Qodobka 73aad
## Shaqada Maxaabiista

Maxaabiista xukumaneyaasha ahi waxay ka shaqaynayaan gudaha ama debedda xabsiga iyaga oo qabanaya shaqada uu u diro Taliyaha Xabsigu, haddii aan dhakhtarku ka reebin, waxaanay u shaqayn karaan sidan:

(1) Haweenka maxaabiista ahi waxay ka shaqaynayaan gudaha xabsiga qaybta haweenka oo keli ah, waxaanay qabanayaan shaqo ku habboon jinsi ahaan.

(2) Maxaabiista da'-yaraha ahi waxay ka shaqaynayaan shaqo la xidhiidha waxbarasho ama xirfad dhaqan-celineed.

(3) Maxaabiista kale ee aan xukunnayni waxay ka shaqaynayaan nadiifinta qolalkooda, daaradda iyo barxadaha xabsiga, farshaxanka, dhar-tolidda iyo shaqooyinka kale ee farsamo ee ay ku habboon yihiin ama loo dooray.

(4) Marka laga reebo maxaabiista ammaanka sare, maxaabiistu waxay ka shaqayn karaan goob kasta oo xabsiga debeddiisa ah, mar kasta oo loo baahdo. Xeer-nidaamiyaha Xeerkan ayaa lagu faahfaahinayaa noocyada maxaabiis ee loo oggolaan karo, nidaamka loo raacayo shaqada debedda ee maxaabiista, illaalada loo baahnaan karo iyo arrimaha la xidhiidha.

## Qodobka 74aad
## Wax-Soo-Saarka iyo Abaal-Gudka Shaqada Maxaabiista

(1) Wax-soo-saarka maxaabiista iyo guud ahaan Ciidanka Asluubta, sida loo maamulayo, qaabka loo jihaynayo, qaabka loo isticmaalayo, waxyaabaha lagu qabanayo, sida loo maal-gelin karo iyo arrimaha la xidhiidha waxa lagu faahfaahinayaa hage uu Wasiirku Xeer Wasiir ku dhaqan-geliyo, kaas oo marka loo baahdo dib-u-eegis lagu samaynayo.

(2) Shaqooyinka uu maxbuusku gunno ama abaal-gud ku mutaysan karo, kuwa aanu ku mutaysaneyn, nidaamka loo raacayo ka-shaqaysiintiisa, sida loogu maamulayo dheefta uu mutaysto, iyo arrimaha la xidhiidha shaqada maxbuuska waxaa lagu nidaaminayaa xeer-nidaamiyaha xeerkan.

## QAYBTA 10AAD
## KALA-SAARISTA MAXAABIISTA

### Qodobka 75aad
### Daryeelka Caafimaadka Maxaabiista

(1) Dhamaan maxaabiista xabsiyada ku xidhan waxay xaq u leeyihiin daryeel caafimaad, shaybaadhis iyo daweyn.

(2) Daryeelka caafimaadka, shay-baadhista iyo daweynta maxaabiista guud ahaan waa masuuliyad saaran Taliyaha Ciidanka, xabsi kastana waxa uga masuul ah Taliyaha Xabsigaa.

(3) Taliyaha Ciidanku isagoo la kaashanaya Wasaaradda Cadaaladda, Wasaaradda Caafimaadka, hay'adaha samafalka iyo bulshadaba wuxuu suuragelinayaa in maxaabiistu hesho daryeelka caafimaad ee ku habboon.

### Qodobka 76aad
### Goobaha Caafimaad ee Xabsiyada

(1) Xabsigu, sida ugu suurto-galsan, wuxuu yeelanayaa bukaan-socod-eegto dhakhtarku ku eego maxaabiista bukta, dawadana loogu hayo.

(2) Xabsiga weyn ee loogu talo-galay maxaabiis ka badan 300, waxa laga hirgelinayaa qol ama ka badan oo waadh ahaan loogu adeegsado maxaabiista bukta ee aan xaaladdooda caafimaad gaadhsiisnayn in loo wareejiyo cusbitaal iyo shay-baadh caafimaad.

(3) Marka xabsiga laga hirgelin kari waayo arrimaha lagu sheegay labada faqradood ee hore ee qodobkan, waxaa adeegyada caafimaad ee xeerkan lagu sheegay u qabanaya xabsiga xarunta caafimaad, goobta caafimaad ama cusbitaalka ugu dhaw xabsigaa.

(4) Cusbitaallada heer gobol waxaa laga hirgelinayaa waadhadh u gaar ah maxaabiista bukaanka ah oo ku habboon ilaalintooda oo si kala gooni ah loogu hayn karo maxaabiista haweenka ah, kuwa da'da yar ee lab iyo ragga waaweyn.

### Qodobka 77aad
### Dhakhtar iyo Kalkaaliyeyaal Caafimaad

(1) Sida ugu suurto-galsan, waxa xabsiyada laga hawlgelinayaa dhakhtar iyo kalkaaliyeyaal u xilsaaran caafimaadka maxaabiista, oo lagu eego bukaanka maxaabiista.

(2) Marka ay suurto-geli weydo in xabsi laga hawl-geliyo dhakhtar ama kalkaaliye caafimaad waxa caafimaadka maxaabiista loo xilsaarayaa dhakhtarka iyo kalkaaliyeyaasha caafimaad ee ugu dhaw xabsiga, kuwaas oo si joogto ah uga warhaynaya caafimaadka maxaabiista.

(3) Marka xaaladda caafimaad ee maxbuusku u baahan tahay dhakhtar takhasus gaar ah leh, ama uu maxbuusku (xaaladdiisa caafimaad ee gaarka ah darteed) leeyahay dhakhtar gaar ah, Taliyaha Xabsigu - ka dib markuu qiimeeyo xaaladda maxbuuska- wuxuu oggolaanayaa in dhakhtarka gaarka ahi uu maxbuuska ku daweeyo xabsiga ama goobta kale ee lagama maarmaanka ah.

(4) Meel-marinta arrimaha ku xusan Qodobka 77aad iyo faqraddaha (1) & (2) ee Qodobkan waxa iska kaashanaya Ciidanka Asluubta, Wasaaradda Cadaaladda iyo Wasaaradda Caafimaadka.

## Qodobka 78aad
## Nadaafadda Xabsiga

(1) Taliyaha Xabsigu wuxuu xil iska saarayaa daryeelka iyo kor-u-qaadista nadaafadda iyo fayo-dhawrka xabsiga, isagoo ku samaynaya kormeer joogto ah.

(2) Heerka nadaafadda iyo faya-dhawrka guud ahaan looga baahan yahay xabsiyada waxaa lagu faahfaahin doonaa xeer-nidaamiyaha.

## Qodobka 79aad
## U-Wareejinta Cusbitaalka Maxaabiista Bukta

(1) Haddii ay khatari ku timaaddo caafimaadka maxbuus ku jira xabsi, Taliyaha Xabsigu wuxuu u wareejin karaa cusbitaalka dawladda markuu arko talada dhakhtarka; marka se ay xaaladdu degdeg tahay, Taliyaha Xabsigu wuxuu amri karaa in maxbuuska la dhigo cusbitaalka isagoo aan helin talada dhakhtarka.

(2) Maxbuuska lagu wareejiyey cusbitaalka dawladda, sida ku xusan faqradda (1) ee Qodobkan, wuxuu ku jiraa ilaalinta sharciga ah ee Taliyaha Xabsiga.

(3) Taliyaha Xabsigu wuxuu qaadayaa tallaabo kasta oo lagama maarmaan ah oo lagaga hor-tegayo in uu baxsado maxbuusku mudddada uu ku jiro cusbitaalka.

(4) Marka dembiga loo xidhay maxbuusku uu culus yahay ama Taliyaha Xabsigu uu arko in maxbuuska si heer sare ah loogu ilaaliyo Cusbitaalka, waxa ilaalinta maxbuuska loo xilsaarayaa xubno Ciidanka Asluubta ah oo aan ka yarayn saddex xubnood oo ilaalintiisa iska nasiya iyagoo aan u kala tegeyn, waxaanay leeyihiin awood kasta oo lagaga hor tegayo in maxbuusku baxsado ka hor intaan lagu celin xabsiga.

(5) Marka maxbuuska xaaladdiisa caafimaad fiicnaato, ee dhakhtarka daweyntiisa ka mas'uulka ahi uu qoraal ahaan ku caddeeyo in maxbuuska laga saari karo cusbitaalka, Taliyaha Xabsigu wuxuu maxbuuska dib ugu celinayaa xabsiga, haddii uu weli xadhig u hadhay maxbuuska.

(6) Haddii uu dhakhtarku lagama maarmaan u arko wuxuu maxbuuska u qorayaa dawo uu ku qaato xabsiga.

**Qodobka 80aad**
**U-Wareejinta Maxbuuska Qaba Juudaan, Baras, AIDS iwm Xarunta ama Cusbitaalka u Gaarka ah Cudurradaas**

(1) Marka lagu arko maxbuus xidhan cudurka juudaanka, barasta, HIV/AIDS iwm ee uu dhakhtar sidaas caddeeyo, Taliyaha Ciidanku wuxuu u diri karaa maxbuuska xarunta ama cusbitaalka u gaarka ah cudurradaas (haddii ay jiraan) oo lagu haynayo inta uu bogsanayo ama xadhiggu u dhamaanayo, isagoo raacaya talada dhakhtarka.

(2) Maxbuusku marka uu cusbitaalka muddo ku jiraba, madaxa cusbtaalka ama xarunta cudurrada gaarka ahi waxa uu warbixin ka siinayaa Taliyaha Ciidanka, isaga oo qoraaya caddayn tilmaamaysa in maxbuusku u baahaan yahay in lagu sii hayo cusbitaalka ama xarunta.

(3) Marka madaxa cusbitaalka ama xarunta caafimaad cudurradda gaarka ahi uu arko in aan loo baaahnayn in maxbuuska lagu sii hayo, waxa uu u gudbinayaa Taliyaha Ciidanka qoraal caddaynaya in maxbuuska ay ka dhammaatay hayntii lagu hayey cusbitaalka ama xarunta, markaas oo Taliyaha Ciidanku dib ugu celinayo maxbuuska xabsiga, haddii aanu ka dhammaan xadhiggu.

(4) Haddii maxbuuska qaba cudur ka mid ah cudurrada ku xusan faqradda (1) ee qodobkani uu yahay maxbuus loo soo xidhay dembi culus, Taliyaha Ciidanku wuxuu kala xidhiidhayaa madaxa cusbitaalka ama xarunta cudurrada gaarka ah sidii looga feejignaan lahaa in maxbuusku baxsado muddada daweyntu u socoto, waxaanu u xilsaarayaa xubno ciidan oo ku filan ilaalintiisa.

**Qodobka 81aad**
**Wareejinta Maxbuuska uu ku Dhaco Cudurka Dhimirku**

(1) Taliyaha Xabsigu marka uu helo caddayn dhakhtar oo ku filan oo ah ”in maxbuuska uu ku dhacay cudurka dhimirku”, wuxuu qaadayaa tallaabo kasta oo lagu xannaanaynayo maxbuuska, waxaanu sida ugu dhakhsaha badan ugu wargelinayaa Taliska, Maxkamadda awoodda u leh iyo Xafiiska Xeer-ilaalinta.

(2) Taliyaha Ciidanku marka uu ku qanco in xaaladda caafimaad ee maxbuusku ay tahay sida Taliyaha Xabsigu kaga soo warbixiyey, wuxuu sida ugu dhakhsaha badan ugu wareejinayaa maxbuuska cusbitaalka dhimirka, iyadoo maxbuusku ku sii jirayo ilaalinta sharciga ah ee Taliyaha Ciidanka.

(3) Haddii maxbuusku yahay mid u xidhan dembi aad u culus, Taliyaha Ciidanku wuxuu maamulka cusbitaalka dhimirka ku wargelinayaa in maxbuusku u xidhan yahay dembi aad u culus waxaanu ku adkaynayaa in ay ka feejignaadaan in uu maxbuusku baxsado, iyadoo uu u xilsaari karo xubno ciidanka ah oo dusha kala socda haynta maxbuuska.

(4) Maxbuusku marka uu bogsado, madaxa cusbitaalka dhimirku wuxuu ogeysiinayaa Taliyaha Ciidanka in maxbuusku dhammaystay daweyntii u socotey, Taliyaha Ciidankuna wuxuu amrayaa

in maxbuuska dib loogu celiyo, haddii aanu weli xadhigii u dhammaanin.

(5) Maxbuusku muddada uu ku jiro cusbitaalka dhimirka, waxa loo xisaabinayaa qayb ka mid ah xadhiga uu ku xukuman yahay.

## Qodobka 82aad
## Ogeysiinta Maxkamadda Wareejinta Maxbuuska

Haddii maxbuuska cusbitaal ama xarun caafimaad loo wareejiyey yahay maxbuus garsuge ah ama ay dacwaddiisu bilaw tahay amaba aanu weli xukunkiisu noqon kama-dambays (final), Taliyaha Xabsigu wuxuu si aan dib-u-dhac lahayn u ogeysiinayaa maxkamadda khusaysa u-wareejinta maxbuuska cusbitaalka ama xarunta caafimaad ee ku xusan Qodobbada (80), (81) iyo (82) ee Xeerkan.

## Qodobka 83aad
## Baxsiga aan Cid Lagu Eedayn Karin

(1) Haddii uu baxsado maxbuus isaga oo ku jira cusbitaalka dhimirka, laguma eedayn karo baxsigaas xubin ciidanka ka tirsan, haddii aanay xubintu u xilsaarrayn ilaalinta maxbuuska.

(2) Baxsashada maxbuuska laguma eedayn karo dhakhtar ama maamulka cusbitaalka dhimirka ama qof kale oo ka mid shaqaalaha cusbitaalkaas, haddii aanay caddayn in uu maxbuuska gacan ku siiyey baxsigiisa ama aanay ka gaabin xaqiijinta tallaabooyinkii lagaga hor-tegi lahaa baxsigaas.

## QAYBTA 12AAD.
## MAXAABIISTA DILKA KU XUKUMAN

### Qodobka 84aad
### Maxbuuska Dilka ku Xukuman

(1) Maxbuuska dilka lagu xukumay waxa lala xidhayaa Maxaabiista ku xukuman dambiyada Culus waxaana si joogta ah loogu haynayaa ilaalo gaar ah.

(2) Maxbuuska dilka ku xukuman waxa loo fududaynayaa in uu waraaqaha u diro ama uu ka helo eheladiisa iyo qaraabadiisa, saxiibbadii iyo qareenkiisa.

(3) Waxa reebban in maxbuuska dilka ku xukuman loo diro wax shaqo ah.

### Qodobka 85aad
### Xabsi-Ku-Haynta Maxbuuska Dilka Ku Xukuman, Qaabka Booqashadiisa iyo Dhawridda Xuquuqdiisa

(1) Marka la booqanaayo maxbuus dil ku xukuman, waxa kor kala soconaya ugu yaraan laba sarkaal oo midkood yahay Taliyaha Xabsiga ama Taliye-xigeenka xabsiga iyo Madaxa Xafiiska Tirada iyo Soo-dhaweynta oo hubinaya in maxbuuska iyo qofka soo booqday aanay si toos ah isugu gudbin wax alaab ah nooc ay doontaba ha noqotee.

(2) Maxbuuska dilka ku xukuman waxa xabsi-ku-hayntiisa la siinayaa fiiro gaar ah, isla markaana waxa loo xaqiijinayaa helidda xuquuqdiisa qofnimo ee aan lagaga qaadin xukunka iyo xuquuqda qofka xorriyadda laga qaaday.

(3) Maxbuuska dilka ku xukuman waxa loo oggolaanayaa in uu la kulmo culimada diinta.

## QAYBTA 13AAD
## DEMBIYADA LA XIDHIIDHA XABSIGA IYO MAXAABIISTA

### Qodobka 86aad
### Alaabta Reebban

(1) Taliyaha Ciidanku, ama Taliyaha Xabsiga oo ka wakiil ah Taliyaha Ciidanku, wuxuu alaabta reebban ku qorayaa qoraal uu saxeexo oo ku qoran afka Soomaaliga, afka Carabiga iyo afka Ingiriisiga, waxaana lagu dhejinayaa meel muuqata oo xabsiga hortiisa ah.

(2) Qof kasta oo amar la'aan geliya xabsi alaab reebban ama amar la'aan ka soo qaada xabsi alaab reebban, wuxuu gelayaa dembi, waxaana lagu xukumayaa 6 (lix) bilood oo xadhig ah ama ganaax aan ka badnayn 3.000.000 Sh. SL. ama labadaba.

(3) Alaabta reebban ee sida sharci-darrada ah loo geliyo xabsiga, Taliyaha Xabsigu wuxuu amri karaa in lala wareego ama in la ganaaxo qofka lagu eedaynaayo, haddii aanu dembigu ahayn mid culus.

### Qodobka 87aad
### Gelidda Oggolaansho La'aan

(1) Qof kasta oo gala xabsi ama ku negaada agagaarka xabsiga ama meel ay ka shaqaynayaan maxaabiisi, isaga oo aan ogolaansho ka haysan madaxda awoodda u leh, wuxuu gelayaa dembi; haddii uu diido in uu ka tago meeshaa marka lagu amro sidaas, waxaana xidhi kara xubin kasta oo ciidan, oo u gudbinaya Booliiska.

(2) Goobta lagu sheegay faqradda (1) ee qodobkan, waa in ay ka muuqataa calaamad ama qoraal muujinaya in aan gelitaankeeda ama ku negaanshaha agagaarkeeda la oggolayn.

(3) Qof kasta oo lagu helo dembiga ku xusan faqrada (1) ee qodabkan waxaa lagu xukumayaa ganaax aan ka badnayn 1,000,000/00 (hal milyan) Sh. SL ama xadhig aan ka badnayn ilaa 3 (saddex) bilood ama labadaba.

### Qodobka 88aad
### Ku-Haysashada Xabsiga Alaab Sharci-Darro ah

Qof kasta oo xabsiga si sharci daro ah ugu haysta alaab aanu lahayn, ama ku caawiya qof kale haysashada sharci-darrada ah ee alaab aanu lahayn, amaba ku dhiirri-geliya qof kale in uu debedda uga saaro xabsiga alaab reebban, waxa uu gelayaa dembi waxaana lagu xukumayaa ganaax aan ka badnayn 2.000.000/00 (laba milyan) Sh. SL. ama xadhig aan ka badnayn 6 (lix) bilood.

**Qodobka 89aad**
**Qas ama Kacdoon**

Qof kasta oo si toos ah ama si dadban u dhiirri-geliya, u abaabula, u hoggaamiya ama si uun talo uga geysta qas ama kacdoon ay maxaabiistu ku kacdo, oo lagaga soo hor-jeedo nidaamka sharciga ah iyo amarrada saraakiisha xabsigu, wuxuu galay dembi, waxaana lagu xukumayaa xadhig illaa 3 (saddex) sano ah, haddii aanu falka ka dhalan dembi aad uga culusi.

**Qodobka 90aad**
**Dabbaqaadda Dembiyada ku Xusan Xeerkan**

(1) Marka uu dhaqan galo Xeerkani, maxaabiista iyo dadka kale ee xabsiga ku gala dembiyada lagu sheegay qaybtan, waxa ciqaabtooda loo raacayaa Xeerkan, waxaana dhegeysiga dacwadaha la xidhiidha dembiyadaa awood u leeyihiin maxkamadaha awoodda sharci u leh si waafaqsan xeerka habka ciqaabta.

(2) Wixii dembi ah ee aan xeerkan lagu sheegin waxaa loo raacayaa xeerarka kale ee ciqaabta.

## QAYBTA 14AAD
## QODOBBADA DHAMMAYSTIRKA

**Qodobka 91aad**
**Maxaabiista Xabsiyada Shisheeye Laga Soo Wareejiyo**

(1) Maxaabiista xukuman ee xabsi shisheeye laga soo wareejiyo, laga bilaabo taariikhda ay xabsiyada Somaliland soo galaan waxay hoos imanayaan Xeerkan, waxaanay xuquuqaha iyo waajibaadyada kala siman yihiin maxaabiista kale.

(2) Soo wareejinta maxaabiista ee xabsiyada shisheeye waxa loo raacayaa Xeerka Wareejinta Maxaabiista.

**Qodobka 92aad**
**Warbixino**

(1) Taliyaha Ciidanku wuxuu sanadkiiba mar warbixin ku saabsan xabsiyada iyo maxaabiista u qorayaa Wasiirka isaga oo ogeysiin siinaya Xeer-Ilaaliyaha Guud.

(2) Taliyaha Ciidanku wuxuu si gaar ah uga warbixinayaa maxaabiista ku xukuman dilka, xabsi daa'inka iyo kuwa xabsiga ku jiray in ka badan toban sanadood, iyada oo lagu qorayo warbixinta maxbuuska foom gaar ah.

## Qodobka 93aad
## Xeer-Nidaamiyaha Xeerkan

Wasiirku, marka uu dhegaysto talo-soo-jeedinta Taliyaha Ciidanka iyo la-taliyeyaasha sharciga ee Wasaaradda, wuxuu soo saarayaa Xeer-nidaamiyaha Xeerkan.

## Qodobka 94aad
## Hageyaasha, Hab-Raacyada iyo Tilmaamaha Xilli-laha ah

Isagoo raacaya Xeerkan iyo xeer-nidaamiyaha, Taliyaha Ciidanku wuxuu soo saari karaa hageyaal (Guideline), Tilmaamo (Directives) iyo hab-raacyo shaqo oo xilli-leh ah oo la xidhiidha xabsiyada iyo maxaabiista.

## Qodobkan 95aad
## Tirtirid

Waxaa la tirtiray xeer kasta ama qodob kasta oo xeer oo ka soo hor-jeeda Xeerkan ama aan la socon karin.

## Qodobka 96aad
## Dhaqan-Galka Xeerka

Xeerku wuxuu dhaqan galayaa marka labada Gole ansixiyaan Madaxweynuhuna saxeexo, faafinta rasmiga ahna lagu baahiyo.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL**

**Baashe Maxamed Faarax**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL**